

Hagaha Waalidka

Hawlaha, talooyinka iyo taageerada khuseysa carruurta, dhalinyarada iyo dadka waaweyn ee ay ka heli karaan deegaankooda.



Muhiim baa tahay!

Waalid ahaan, waxaad tahay qof muhiim u ah nolosha ilmahaaga. Hagahaan Waalidka, waxaan rabnaa inaan kugu hagno adiga ku nool Koonfurta-galbeed ee magaalada Göteborg dhammaan adeegyada, taageerada iyo macluumaadka kale ee aad uga baahan karto doorakaaga waalidnimo.

Hagaha waalidku waxa kale oo uu idinka caawin karaa adiga iyo qoyskaaga inaad heshaan nashaadyo madadaalo leh iyo meelo aad u tamashlayn tagtaan oo ku yaala agagaarka degmadaada. Hagaha sidoo kale waxaa loogu talagalay adiga oo boos muhiim ah u jooga sidii qof weyn oo kale ama la kulma carruurta iyo qoysaska inta aad ku gudojirtid shaqadaada, si aad u caawiso kuna hagto si xasilooni leh oo wanaagsan

Hagaha waalidiinta, waxaanu ku soo ururinay adeegyo badan oo diyaar ah, laakiin dabcan wax badan oo dheeraad ah ayaa jira oo laga dooran karo gudaha xaafadaada iyo inta kale ee magaalada Göteborg labadaba. Kalandarka magaalada Göteborg waxaad ka heli doontaa, tusaale ahaan waxqabadyo badan. **kalendarium.goteborg.se**

Waxaan rajaynaynaa in hagaha uu kuu fududeeyo adiga iyo qoyskaaga inaad heshaan waxaad raadinaysaan!

Xarumaha Goyska	5
Dugsiga Xannanada ee Furan	7
Dugsiga Xannanada iyo Xannano-maalmeedka goyska.....	9
Dugsiga hoose/dhexe iyo dugsiga gaarka ah	10
Dhaqanka iyo Maktabad	12
Goobaha kulamada iyo waxqabadyada xilliyada firaaqada	18
Is hawl-geli sidii qof wayn oo muhiim ah	22
Amaaho qalabka xilliga firaaqada iyo qalab-ciyaareed	24
Jimcsiga, ciyaaraha iyo goobaha ciyaaraha.....	25
Goobaha dalxiis-ciyaareedka.....	27
Hawlo ciyaareed kale	29
Dabbaal iyo Dabeecadaha.....	30
Dabbaasha gudaha.....	31
Dabbaasha dibadda	32
Dareen-xasuuseedyada dabeecadda.....	34
Khariidad – Hawlo iyo goobaha dalxiiska	36
Talo iyo Taageero	38
Taageero ku socota waalidka.....	39
Taageero ku socota xigtada.....	43
Taageerada carruurta iyo dhalinyarada	46
Hanjabaadda iyo gacan ka hadalka ka dhex dhaca xiriirada dhow	48
Marka rabshadayn yihiin ama dhibateysan yihiin carruurta iyo dhalinyarada.....	50
Marka ay dhacdo gacan-ka-hadal iyo cadaadis la xariira sharaf.....	51
In badan oo kale oo aad u aadi kartid taageero.....	52
Daryeelka Caafimaadka	54
Xarumaha caafimaadka iyo Xarumaha daryeelka carruurta (BVC).....	56
Rugaha caafimaadka ee carruurta qaba xanuunka dhimirka	58
Rugta daryeelka ilkaha ee dadweynaha.....	59

Bilaash!

Ma raadinaysaa dhaqdhaqaaqyo aan lacag ku kacayn?

Raadi calaamada bilaash-ka! Haddii calaamadda si toos ah loo hoos dhigo ciwaanka sare, markaa waxaa jira dhaqdhaqaaqyo bilaash ah dhammaan waxqabadyada qaybtaas. Waxa kaloo jiri kara dhaqdhaqaaqyo lacag ku kacaya, weydii shaqaalaha goobta jooga wayna kuu sheegi doonaan.



Calankan waxa uu ka dhigan yahay in waxqabadku yahay mid LGBTQ shahaadadiisa leh.



Markaad labadan calaamad ku aragto buug-yaraha, waxay la macno tahay in ganacsigu ka firfircoon yahay Facebook iyo/ama Instagram-ka.

Xarumaha Qoyska

Loogu talagalay adiga leh caruur da'doodu u dhaxayso 0-6 sano

Bilaash!

Xaruumaha qoyska ee degmada koonfurta-Galbeed ee magaalada, adiga waalidka ah ama waalid noqonaya kusoo dhawoow. Xarumaha qoysku waxay si wadajir ah u wada shaqeeya rugta umulisada, xarunta daryeelka carruurta, adeegga bulshada iyo dugsiga xannaanada ee furan. Dugsiga xannaanada ee furan waxaa adiga iyo qoyskaagu kula kulmi kartaan qoysas kale kana qayb qaadan kartaan hawlo kala duwan. Halkan waxay ku siinaysaa goob ay carruurto ku ciyaaraan iyo taageero si fudud loo heli karo oo adiga waalid ahaan looga talagalay.

Xarunta qoyska, waxaad kamid ah waxyaabaha looga hadli karta:

- » Doorarka waalidka
- » Xad-dejinta
- » Cunto
- » Hurdo
- » Cilaaqaadka

Halkan waxaad ka qayb qaadan kartaa hawlaha soo socda:

- » Kulamo mawduucyeed
- » Koorso la xariirta waalidnimada
- » Wadahadal gaar ah oo lala yeesha shaqaalaha
- » Massaaja siinta dhallaanka

Koonfurta-galbeed ee Göteborg waxaad ka heleysaa laba xarumo qoysseed ah.



Xarunta Goys ee Trädet



Talefoon

Rugta umulisada:

031-346 08 90

Xarunta Daryeelka Carruurta:

031-346 08 91, 92, 93, 94

Dugsiga Xannaanada ee furan:

031-366 23 93 och 031-366 23 92

Dugsiga Xannaanada ee furan:

031-367 64 91

Cinwaanka bogga internetka:

goteborg.se/familjecentralentradet



Xarunta Goys ee Opaltorget

Talefoon

Rugta umulisada:

031-346 08 60

Xarunta Daryeelka Carruurta:

031-747 83 90, 91, 92

La talinta waalidka/taageerada

waalidka: 031-366 41 03 ama

031-366 10 78

Dugsiga Xannaanada ee furan:

0727-26 11 79

Cinwaanka bogga internetka:

goteborg.se/familjecentralenopaltorget

Cinwaanka: Zirkongatan 7,

Västra Frölunda



Dugsiga Xannanada ee furan

0-6 jir

Bilaash!

Dugsiga xannaanada ee furan waa meel ay ku kulmaan dhammaan qoysaska. Carruurta da'doodu u dhaxayso 0-6 jir oo ay la socdaan sida adiga waalid ahaan ama qof kale oo weyn ayaa halkan kusoo dhawaanaya. Adiga oo qofka weyna ah ayaa mas'uul ka ah ilmahaaga waxaana ka wada qaybqaadanaysaan hawlaha. Waa bilaash in la booqdo dugsiyada xannanada ee furan mana u baahnid inaad horay isu diiwaangeliso. Halkan adiga iyo ilmahaagu waad ku ciyaari kartaan, samayn kartaan farshaxanno, heeso iyo in weheshatid shaqaale tababaran iyo carruurta iyo waalidiinta kale.

Waxaad sidoo kale ka heli kartaa taageero la xariirta waalidnimadaada shaqaalaha haddii aad qabtid su'aalo ama fikir. Halkan waxaad kula wadaagi kartaa talooyin, fikrado kalana doodi kartaa nolol maalmeedka waalidiinta kale ee leh carruurta yaryar ee ku jira xaalado la mid ah.

Bogga internetka waxaad ka heli kartaa saacadaha ay furanyihiin iyo macluumaad kale. Xaafadaha koonfurta-galbeed ee magaalada waxa ay leeyihiin saddex dugsi xanaano oo furan, laakiin waxa kale oo aad ka hubin kartaa kaniisadda kuugu dhow haddii ay leeyihiin dugsi xannaano oo furan.

Bogga internetka:

goteborg.se/oppnenforskola

Dugsiga Xannaanada ee Furan ee Axel

Talefoon:

031-367 67 30 ama 0790-98 20 21

Iimayl: oppna.forskolan.axel@forskola.goteborg.se

goteborg.se

Cinwaanka: Axel Dahlströms Torg 3, Göteborg

Maxaaddada: Axel Dahlströms Torg

Dugsiga Xannaanada ee Furan ee Opalorget

Talefoon: 031-366 47 03 ama 0727-26 11 79

Iimayl: oppna.forskolan.opalorget@forskola.goteborg.se

Cinwaanka: Zirkongatan 7, Västra Frölunda

Maxaaddada: Opalorget



Dugsiga Xannaanada ee Furan ee Opalorget Galbeedka göteborg

Dugsiga Xannanada ee Furan ee Trädet

Telefoon: 031-367 64 91, 92 ama 0728-55 45 58

Imayl: oppna.forskolan.tradet@forskola.goteborg.se

Bogga internetka: goteborg.se/oppnaforskolantradet

Cinwaanka: Cinwaanka jira waxaad ka heleysaa Bogga internetka.



Familjecentralen Trädet

Dugsiga Xannanada ee Furan ee Kaniisadda

Swiidhan

Kaniisada Iswiidhan waxay ku leedahay dugsiiyo xanaano oo furan xaafadaha Furåsen, Tynnered, Näset, Västra Frölunda, Askim iyo Billdal.

Waxqabadyadu waxay u furan yihiin waaliinta iyo carruurta yar. Carruurta da'doodu kala duwan tahay waxay iman karaan meelo kala duwan, booqo bogga internetka wixii macluumaad dheeraad ah. Soo dhawow!

Bogga internetka:

svenskakyrkan.se/vastra-frolunda-pastorat/for-barn-och-familj



Dugsiga Xannanada iyo Xannano-maalmeedka qoyska

1-5 jir

Dugsiga xannanada wuxuu ka caawinayaa ilmahaagu inay si wanaagsan ugu bilaabato nolosha wuxuuna aasaas ugu noqdaa waxbarasho joogto ah noloshiisa dhan. Ciyaartu waxay muhiim u tahay korriinka ilmaha, si uu ilmuhu u helaan tijaabinta male-awaalkooda iyo hal-abuurkooda, bartaan inay fahmaan dareenka dadka kale ayna is kaashadaan. Dugsiga xannanada waxa ka mid ah waxbarid kicinaysa oo xiisa gelineysa carruurta.

Codsashada iyo helidda dugsiyada xannanada

Dugsiga xannanada waxaa loogu talagalay dhammaan carruurta da'doodu ka bilaabato hal sano, halkaas oo dhammaan carruurta da'doodu tahay 3-5 sano ay xaq u leeyihiin boos bilaash ah 15 saacadood todobaadkii. Codsiga waxaa lagusoo gudbiyaa barta goteborg.se/forskola ama qaab foom ah ugu horreynta lix bilood ka hor inta uusan ilmahaagu u baahanin boos. Aagga koonfurta-galbeed ee magaalada, waxaa ku yaal dugsigo xannaano oo ay degmada leedahay iyo kuwo madaxbannaan. Barta goteborg.se gudaha qaybta "Hitta förskolor" waxaad arki kartaa dhammaan dugsiyada xannanada ee la kala dooran karo. Bisha Agoosto ee sanadka ilmuhu lix jirsado, ilmuhu wuxuu bilaabaa fasalka xannanada dugsiga. Fasalka xannanada kadib waxaa laga dalbadaa dugsiyada degamada inta u

dhaxaysa 15 Disembar iyo 15 Febraayo ka hor simistarka dayrta. Codsiga waxaa laga samayn karaa si elektaroonig ah bogga goteborg.se.

Taageerada laga helo dugsiga xannanada

Dugsiga xannanada, barbaariyayaasha gaarka ah waxay la shaqeeyaan barbaariyayaasha caadiga ah ee dugsiga si loo hubiyo in dhammaan carruurta ay waqti fiican ku helaan dugsiga xannanada oo ay baran karaan waxyaabo cusub. Barayaasha gaarka ah waxay sidoo kale la shaqeeyaan adiga waalid ahaan si ay u siiyaan ilmahaaga taageero dheeraad ah haddii loo baahdo. Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan dugsiga xannanada, xannaano-maalmeedka qoyska, codsiga iyo taageerada waxaad ka heli kartaa barta bogga internetka.

Bogga: goteborg.se/forskola

Dugsiga hoose/dhexe iyo Dugsiga gaarka ah

6–16 jir

Bilaash!

Dugsiga waa in ilmahaaga loo ogolaado inuu horumariyo oo uu barto waxyaabo cusub. Halkan, shaqaalaha dugsigu way idin kala kaashanayaan waalid ahaan si aad si wada jir ah u kaalmaysaan ubadkaaga sida ugu wanagsan ee uu u korayo.

Dhammaan carruurta Iswiidhan ku nool waa inay aadaan iskuul muddo toban sano ah. Waxa loo yaqaan dugsi-dhigashada waajibka ah waxayna khusaysaa laga bilaabo xilliga dayrta ee sannadka uu ilmuhu 6 jirsado. Dugsigu waxa uu leeyahay fasalka xannaanada ugu dambeeya iyo dugsiga hoose iyo dhexe ee fasalada 1-9. Sannad-dugsiyeed kastaa waxa uu leeyahay xilli-dugsiyeedka dayrta iyo xilli-dugsiyeedka gu’ga oo leh qorshayaal la xidhiidha waxyaalaha ay tahay inay ardaydu bartaan, kuwan waxaa loo yaqaan qorshayaasha koorsada iyo manhajka. Waxa kale oo jira dugsiyo hoose oo gaar ah kuwaas oo sharciyo kale lagu dabaqo.

Codsashada dugsiyada

Xaafadaha Koonfurta-galbeed ee magaalada Göteborg waxaa ku yaal dugsiyo hoose/dhexe iyo dugsiyo hoose oo gaar ah oo loogu talagalay ardayda da’doodu u dhaxayso 6 iyo 16 sano. Bogga goteborg.se ee hoostiisa qaybta ”Raadi dugsiyada hoose iyo kuwa gaarka ah” waxaad ka arki kartaa dhammaan dugsiyada diyaarka u ah in la dalbado. Dhammaan carruurta ka diiwaan gashan magaalada Göteborg waxa loo ballan qaaday boos ka mid ah dugsiyadeenna. Mas’uul ahaan, waxaad dooran kartaa dugsiga aad rabto in ilmahaagu dhigto. Waxay khuseysaa lagasoo bilaabo fasalka dambe ee xannanada ilaa fasalka 9aad.

Ma jiraan wax saf ah oo loo galo dugsiyada magaalada Göteborg. Haddii ay jiraan codsadeyaal ka badan kuwa boosaska la heli karo, magaalada Göteborg waxay leedahay sharciyo lagu kala saarayo ardayga booskaas xaq u yeelanaya. Bogga goteborg.se/grundskola waxaad ka dalban kartaa boos dugsi hoose oo ay degmada leedahay waxaadna akhriin kartaa sida ay u egyihiin sharciyada boosaska lagu bixiyo. Haddii aad rabto inaad codsato dugsiyada gaarka loo leeyahay, toos ula xidhiidh dugsigaas. Haddii aadan soo dirin arji oo aadan sameynin doorasho dugsi, ilmahaagu wuxuu boos ka helayaa dugsiga u dhow guriga aad degantahay.

Taagero gudaha dugsiga

Dugsi kasta, dhammaan ardaydu waxay heli karaan adeegga caafimaadka ardayda oo ka shaqeeya horumarinta, ka hortagga iyo taageeridda horumarka ardayga ee ku wajahan ujeedooyinka waxbarashada. Kooxda caafimaadka ardaydu waxay ka kooban yihiin dhakhtarka dugsiga, kalkaalisada dugsiga, lataliye, cilmi-nafsi yaqaan, macalinka waxbarashada gaarka ah iyo maamulaha. Caafimaadka ardaydu waxay u jiraan ardayda awgood, laakiin adiga waalid ahaan sidoo kale waxaad u jeedin kartaa caafimaadka ardayda ee dugsiga si aad talo iyo taageero ugu hesho ilmahaaga.

Xarunta xilliga firaaqada

Kahor iyo ka dib saacadaha dugsiga, waxaa jira xarumo firaaqo oo loogu talagalay carruurta u dhaxaysa da'doodu 6 iyo 13 sano. Waxaad ka heli doontaa macluumaad dheeraad ah iyo foom codsi ah bogga goteborg.se/fritidshem. Waxaad ka heli kartaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan dugsiga, xarunta xilliga firaaqada, taageerada iyo codsiga dugsiga bogga internetka.

Bogga internetka:

goteborg.se/grundskola

Raadinta shaqo xilliga xagaaga

Adiga dhigta fasalka 9aad ama fasalka 1aad ee dugsiga sare waxaad ka codsan kartaa shaqo xilliga xagaaga ah gudaha magaalada Göteborg. Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan shaqooyinka xagaaga ee magaalada Göteborg waxaad ka heli kartaa bogga internetka. Bogga waxa kale oo ku jira macluumaadka xidhiidhyada haddii aad hayso su'aalo ama faallooyin ku saabsan shaqooyinka xagaaga.

Bogga internetka:

goteborg.se/sommarjobb

Laylis-caawinta

Göteborg, waxaad ka heli kartaa caawimo shaqo-guri dhowr maktabadood. Kuwa kaa caawiya shaqo-guriyeedkaagu waxay noqon karaan arday kale, tabaruceyaal ka socda ururo kala duwan ama shaqaalaha maktabadda. Caawinta shaqada-gurigu waxaa loogu talagalay ardayda qaan-gaarka ah wax ka baranaaya dugsiga hoose/dhexe ama dugsiga sare. Jadwalka kalendarerka waxaad ku arki kartaa maktabadaha aad ka heli karto caawimada shaqo-guriyeedka.

Bogga internetka:

kalendarium.goteborg.se



Dhaqanka iyo Maktabadaha

Guriga dhaqanka ee Frölunda

Da' walba

Xarunta dhaqanka ee Frölunda waxaad ka dhageysan kartaa muusik, waxaad daawan kartaa masraxiyada carruurta waxaadna aadi kartaa shaleemo, qoob ka ciyaarka, masraxyo ama bandhigyo kale. Halkan waxa kale oo aad tijaabin kartaan sirkuus cusub. Qolka farshaxanka ee cusub waxaad isku dayi kartaan rinjiyeyn loogu talogalay da'aha kala duwan. Waxa kale oo jira waxqabadyo furan oo leh mawduucyo kala duwan, farsamada gacanta ee axadaha iyo bandhigyo farshaxan. Siminaaro, koorasyo iyo muxaadaooyin ayaa sidoo kale lagu bixiyaa halkan.

Xilliga xagaaga, guriga dhaqanka wuxuu bannaanka beerta Positiv ee Frölunda ku qabanqaabiyaa waxqabadyo madadaalo leh. Waxaad ka heli kartaa macluumaadka ku saabsan saacadaha furitaanka ee xarunta dhaqanka iyo barnaamijyada bogga internetka.

Talefoon: 031-366 27 20

Talefoon (qasnadda tigidka):
031-366 27 25

limayl: reception.kulturhuset@kultur.goteborg.se

Bogga internetka:
goteborg.se/frolundakulturhuset

Cinwaanka: Valthornsgatan 13,
Västra Frölunda

Maxaaddada: Frölunda Torg



Dugsiga dhaqanka

6-19 jir

Dugsiga dhaqanka waxay ilmahaaga oo ay da'doodu u dhaxayso 6-19 ka heli karaan duruus maadooyin badan oo kala duwan oo la xariirta maadooyinka bilicda, tusaale ahaan qoob ka ciyaarka, riwaayadaha, rinjiyeynta, dhoobada, isla heesidda, filimaanta iyo qalabyada muusikada oo badan kalana duwan. Qalab ayaa laga kireysan karaa maqaasiinka qalabka waana bilaash afarta simistar ee hore. Ilmahaaga had iyo jeer waa lagu soo dhaweynayaa halkan, iyadoon loo eegin aqoontooda hore ama baahiyo. Ilmahaagu waxa uu ka qayb qaadan karaa bandhigyada jilidda, riwaayadaha, bandhigyada iyo dhacdooyinka dhaqanka la xariira. Dhaqdhaqaaqyada dugsiga dhaqanku waxa uu ka dhacaa qolalka dugsiga dhaqanka, dugsiyada, barxadaha waqtiyada firaqada wuxuuna qabsoomaa wakhtiyada firaqada ee caruurta. Khidmada xilli-dugsiyeedkiiba waa 300 oo karoon. Dugsiga dhaqanku waxa kale oo uu leeyahay hawlo furan, diiwaangelin hore aysan jirin, kuwaas oo bilaash ah.

Macluumaad dheeraad ah waxaa laga heli karaa mareegahayaga.

Talefoon: 031-366 44 81

Iimayl:

kulturskolan.vgbg@goteborg.se

Bogga internetka:

goteborg.se/kulturskolan

Guriga Axelhuset

Da' walba

Bilaash!

Axelhuset waa goob kulan oo wacan oo da' walba leh waxayna ku taal fagaaraha Axel Dahlström. Axelhuset waxaa ku yaal maktabadda Högsbo, xarunta xilliga firaqada ee Axel iyo dugsiga xannaanada ee furan ee Axel. Halkan adiga iyo ilmahaagu waxaad ku nasan kartaan hoolka laga soo galo oo aad luuqa qaxwada ka iibsan kartaan qaxwo fudud. Waxa kale oo aad ka qayb qaadan kartaa koorasyo kala duwan ama istuudyo furan iyo goob-isboorti oo aad geli karto xilli kasta, kiraysan kartaa qolalka shirarka iyo xafladaha, dhageysiga muxaadaroooyinka, bandhigyada dareenka leh, aadi kartaa masraxyada carruurta iyo madadaalo kale oo badan oo aad sidoo kale ka qayb qaadan karto aadna qabanqaabin karto. Saacadaha furanyihiin iyo macluumaadka kale waxaad ka heli kartaa mareegaha.

Talefoon: 031-366 04 00

Iimayl: axelhuset.fritid@socialsydvast.goteborg.se

Bogga internetka: goteborg.se/axelhuset

Cinwaanka:

Axel Dahlströms torg 3, Göteborg

Maxaaddada: Axel Dahlströms torg

Maktabad

Da' walba

Bilaash!

Had iyo jeer waxa jira maktabad agtaada ah, qaab dijital ah oo laga heli karo degmada aad ka degantahay magaalada. Waa lagugu soo dhawaynayaa mid kasta oo aad rabto. Waxaad isticmaalaysaa adeegyadayada dhijitaalka ah, amaahanaysaa aadna u soo celineysaa si la mid ah meel kasta. Had iyo jeer waa bilaash, qof walbana u furanyahay. Maktabadaha, dadka waaweyn iyo carruurtaba waxay ka amaahan karaan buugaag, buugaag maqal ah, filimaan iyo ciyaaraha fiidyowga ah, ama waxay heli karaan talooyin la xariira buugaagta kor loo akhriyo. Waxaad sidoo kale akhriin kartaa jaraa'idka iyo joornaalada, amaahan kartaa kombuyuutar ama waxaad ku khadka ku xidhan kartaa Wi-Fi-ga bilaashka ah ee maktabadda.

Bogga internetka:

goteborg.se/bibliotek



Maktabadda Frölunda

Maktabadda Frölunda waxay ku taal guriga dhaqanka ee Frölunda. Halkan waxaad ka heleysaa buugaag da' o kala duwan loogu talagalay kuna qoran luqado badan. Waxaa yaala sheeko indho-sarcaadeed, sheekooyin cabsi-cabsi ah iyo sheekooyin cajiib ah oo kicinaya xiisaha akhriska ee adiga iyo ilmahaaga. Qolka la yiraahdo Äppelrummet waxaa ku yaal warbaahiyaal oo loogu talagalay carruurta iyo dhallinyarada oo lagu akhriin karo indhaha, dhegaha iyo faraha afkooda. Halkan waxa kale oo aad ka heli doontaa qoraal-xaqiiqeed oo loogu talagalay dadka lixaadkooda ka duwanyahay inta kale. Maktabadda dhexdeeda, qof kastaa wuxuu ka heli karaa sheekooyin uu iska garanaayo.

Maktabadu waxay u qabanqaabisaa hawlo badan oo loogu talagalay waalidiinta iyo carruurta labadaba, wax kasta oo la xariira kafateeriyada luqadda iyo muxaadaroyin ku saabsan waalidnimada ilaa muusiga iyo heesaha oo loogu talagalay kuwa aadka u yaryar. Ku soo dhawoow!

Talefoon: 031-366 28 40

Imayl:

frolunda.bibliotek@kultur.goteborg.se

Bogga internetka:

goteborg.se/frolundabibliotek

Cinwaanka: Valthornsgatan 13,
Västra Frölunda

Maxaaddada: Frölunda Torg



Maktabadda Askim

Maktabada Högsbo waxay ku taal Axelhuset. Maktabadu waxay qabanqaabisaa, waxyaabo ay ka mid yihiin, masraxyada carruurta, kulamada buugaagta ee dhalinyarada iyo wakhtiyada sheekada ee dhallaanka iyo carruurta yaryar.

Talefoon: 031-366 31 90

Iimayl:

askims.bibliotek@kultur.goteborg.se

Cinwaanka: Askims torg 5, Askim

Bogga internetka:

goteborg.se/askimsbibliotek

Maxaaddada: Askims Stationsväg



Maktabadda Högsbo

Maktabada Högsbo waxay ku taal Axelhuset. Maktabadu waxay qabanqaabisaa, waxyaabo ay ka mid yihiin, masraxyada carruurta, kulamada buugaagta ee dhalinyarada iyo wakhtiyada sheekada ee dhallaanka iyo carruurta yaryar.

Talefoon: 031- 366 04 00

Iimayl:

hogsbo.bibliotek@kultur.goteborg.se

Bogga internetka:

goteborg.se/hogsbobibliotek

Cinwaanka:

Axel Dahlströms torg 3, Göteborg

Maxaaddada: Axel Dahlströms torg



Maktabadda koonfurta skärgården

Maktabadda koonfurta Skärgården waxaad ka heli doontaa dhismaha dugsiga Styrso. Waa maktabad raaxo leh oo aad la fariisan karto wargeys, wax ku baran karto ama ku akhrin karto sheeko qaybta carruurta.

Halkan waxaa laga heli karaa shabakad khadka internetka oo xadhig la'aanta ah, kombuyuutar, daabacayaal iyo iskaana. Waxaan haynaa buugaag, wargeysyo, ciyaaraha fiidiyowiyada iyo filimaan loogu talagalay da' kasta.

Talefoon: 031-366 57 80

limayl: sodra.skargardens.bibliotek@kultur.goteborg.se

Bogga internetka: goteborg.se/sodraskargardensbibliotek

Cinwaanka: Brattenskogen 42, Styrso

Maxaaddada: Styrso Bratten

Maktabadda Opalorget

Maktabadda loogu talagalay carruurta ee Opalorget waxay furmi doontaa gu'ga sanadka 2023. Halkaas waxaad ka heli doontaa buugaag loogu talagalay da'o kala duwan kuna qoran luuqado kala duwan. Waxaa yaala sheeko indho-sarcaadeed, sheekooyin cabsi-cabsi ah iyo sheekooyin cajiib ah oo kicinaya xiisaha akhriska ee adiga iyo ilmahaaga.

Talefoon: 031-366 28 40

limayl: frolunda.bibliotek@kultur.goteborg.se

Bogga internetka: goteborg.se/frolundabibliotek

Cinwaanka: Ametistgatan 2, Västra Frölunda

Maxaaddada: Opalorget

Basaska buugaagta

0-13 jir

Basaska buugaagta, waxaad ka heli doontaa buugaag loogu talagalay carruurta da'doodu u dhaxayso 0-13 sano. Intaa waxaa dheer, iyada oo aan loo eegin da'da, waxaad soo qaadan kartaa buugaag aad dalbatay ama soo celin kartaa waxaad amaahatay. Mid ka mid ah baska buuggu wuxuu muuqaal matalayaa markab khiyaali ah kan kalena kayn-sheekeed. Basasku waxay booqdaan dugsiyada xannaanada ee magaalada Göteborg Isniinta ilaa Jimcaha, dugsi xannaaneed kasta waxa la soo booqdaa afartii toddobaadba mar.

Sabtida, basaska buuggu waxa kale oo ay sameeyaan safarro badan oo ay ku tagaan meelo kala duwan oo Göteborg ah. Waxaad kala socon kartaa halka basaska ay u socdaan mareegaha internetka.

Iimayl: bokbuss@kultur.goteborg.se

Bogga internetka:
goteborg.se/bokbussen



Goobaha kulmada iyo waxqabadyada xilliyada firaaqada

Bilaash!

Waxqabadyada xilliyada firaaqada ee xaafadaha koonfurta-galbeed ee magaalada waxay bixiyaan nashaadyo aamin ah iyo hawlo bulsheed iyo sidoo kale goobo ay ku kulmaan dhalinyarada oo ay ku horumaraan. Waxqabadyadu waxay diyaar yihiin dugsiga ka dib, fiidkii, maalmaha fasaxa ah iyo fasaxyada dugsiga. Halkan, carruurta iyo dhalinyaradu waxay ka qaybqaadan karaan waxqabadyo kala duwan oo ay kala dooran karaan oo ay sidoo kale gacan ka geysan karaan qorsheyntooda. Sidoo kale albaabku mar walba wuu u furan yahay waalidiinta dhalinyarada.

Hawluhu waa bilaash waxayna ku salaysan yihiin tabaruc, ka qaybqaadasho iyo waxbarasho. Kuma xirxiro dugsiga ubadkaagu uu dhigo, qof walba waa la soo dhawaynayaa!



Xarunta xilliga firaaqada ee Axelhuset

13-15 jir

Xarunta firaaqada ee Axel waa goob kulan oo loogu talagalay ardayda dhigata dugsiga sare. Waxaad halkan u iman kartaa si aad saaxiibo ula kulanto, ku qaxwayso, ku ciyaarto ciyaaro, ku samaysato wax istuudiyahayaga kana qayb qaadato hawlaha. Halkan, qof kastaa waxaa uu ka qaybqaadan karaa kana qayb ahaan karaa go'aminta waxa dhacaya.

Telefoon: 031-366 04 88

limayl: axelhuset.fritid@socialsydvest.goteborg.se

Cinwaanka:

Axel Dahlströms torg 3, Göteborg

Maxaaddada: Axel Dahlströms torg

Xarunta xilliga firaaqada ee Pilen

10-15 jir

Xarunta xilliga firaaqada ee Pilen waa goobta kulanka dhalinyarada ee Askim. Halkan waad ku kulmi kartaan, ku raaxaysan kartaan, dhageysan karnaa muusikada, daawan kartaan filimaanta, ku tababaran kartaan, abaabuli kartaan diskotig ama waxaad si wadajir ah u abuurti kartaan waxqabadyo madadaalo leh. Halkan waxaa imaan kara adiga dhigta fasalka 5aad iyo wixii ka sareeya, waxaadna imaan kartaan dugsiga ka dib si aad isku weheshataan una tijaabisaan waxqabadyo kala duwan oo hal abuur leh. Hoolka ciyaaraha, waxaad ku ciyaari kartaan ciyaarta xeeqada gudaha ah, ciyarta bilyaardiga iyo ciyaaraha kale ee kubbadda.

Maalmaha Isniiinaha, xitaa adiga dhigta fasalka 4aad iyo wixii ka sareeya ayaa ka qayb qaadan kara waxqabadka loo yaqaan Kulturpilen, waxqabad dhaqameed furan oo ay isla wadaan Dugsiga Dhaqanka.

Telefoon: 0706-11 84 94 ama 031-366 34 80

limayl: kulturpilen@socialsydvest.goteborg.se

Bogga internetka: goteborg.se/fritidsgardenpilen

Cinwaanka: Askims Pilegårdsväg 25, Askim

Maxaaddada: Pilegården



Xarunta xilliga firaaqada ee Linden

10-12 år

Linden waa qayb ka mid ah xadiiqadda Positivparken waana goob kulan oo loogu talagalay qof walba, iyada oo si gaar ah diiradda loo saaray carruurta iyo dhalinyarada. Halkan waxaad ku samayn kartaa shaqo-guri, kula kulmi kartaa asxaabta, ku ciyaari kartaa ciyaaraha fiidiyowga, samaynta farsamada gacanta, kubad ku ciyaarista, jimicsiga ama ciyaaraha kale. Maalmaha fasaxa ah waxa jira hawlo qoyska oo dhan ah.

Telefoon: 031-366 04 83

limayl: linden@socialsydvest.goteborg.se

Cinwaanka: Positivgatan 5, Västra Frölunda

Maxaaddada: Positivgatan ama Frölunda Torg



Lookalka 426

13-19 jir

Lookalka looyaqaan 426, waxaan ku dhisnaa waxqabadkeenna si wadajir ah dhalinyarada iyadoo laga duulayo hindisahooda. Waxyaabaha kale, waxaa ka mid ah gelitaanka ciyaaraha, dubista, istuudiyaha musikada, qolka jimicsiga iyo istuudiyaha sawirada iyo filimaanta. Waxa kale oo aad haysataa fursad aad ku samayso LAN, filin-duubis, bandhigyo ama wax kasta oo aad ka rabto halkan. Lookalka looyaqaan 426 wuxuu kaloo qabanqaabiyaa koorsooyin iyo aqoon-is-weydaarsiyo, tusaale ahaan, giitaarka, koorsada DJ-nimada, filin/sawir, dugsi heesaha kulul ee roka, sawir-naqshadaynta ee maangada, qoob-ka-ciyaarka, ama koorsooyin oo gebi ahaanba sida aad rabto ah. Halkaan waxaa jooga hogaamiyayaal ay ka go'antahay halkan inay kaa caawiyaan inaad ka meel gaarto fikradahaaga.

Gudaha Lookalka looyaqaan 426 waxa kale oo ku taal kafateeriya aad saaxiibo kula qaadan karto waqtiga, ka qaxwayn karto, hawlo ku samayn karto oo aad kala xidhiidhi karto shaqaalaha kooxda kubbadda gacanta ee Önnered iyo hawlaha wakhtiga firaqada.

Bogga internetka:

goteborg.se/lokal426

Cinwaanka: Redegatan 18

Maxaaddada: Påvelunds Centrum, Västra Frölunda

Xarunta Mellangården

10-13 jir

Barxadda dhexe, waxaad ugu qayb qaadan kartaa nashaadyo kala duwan, sida muusik, ciyaaro, qoob ka ciyaarka iyo rinjiyeynta - ama waxaad waqti la qaadan kartaa carruurta iyo dhalinyarada kale. Barxadda dhexe agteeda waxaa ku yaal garoon isboorti oo caadi ah oo lagu ciyaaro, isboorti lagu sameeyo iyo waxqabadyo kale oo bannaanka ah oo madadaalo leh.

Talefoon: 031-366 41 79 ama 0725-41 14 12

Cinwaanka: Smaragd gatan 28, Västra Frölunda

Maxaaddada: Brilljantgatan

Golaha dhalinyarada

Golaha dhalinyarada wuxuu ka kooban yahay 101 dhalinyaro ah oo ka kala yimid dhamaan xaafadaha Göteborg. Halkaan, dhalinyarada da'doodu u dhaxayso 12-17 ayaa ku kulma oo ka wada hadlaya arrimo kala duwan oo khuseeya dhalinyarada magaalada. Arrimaha ay rabaan in ay u dhaqaaqaan waxaa go'aan ka gaaraya dhallinyarada laftooda.

limayl: ungdomsfullmaktige@goteborg.se

Bogga internetka: goteborg.se/ungdomsfullmaktige

Guriga dhalinyarada ee 1200 kvadrat

13-19 jir

Guriga dhalinyarada ee looyaqaan 1200 Kvadrat, hindisayaashaada iyo xiisahaaga ayaa ah mid diiradda la saaraya. Shaqaale khibrad leh ayaa halkan u jooga inay kaa taageeraan fikradahaaga. Waxay noqon kartaa in ay ku saabsantahay ku samaynta naadiyada guriga dhexdiisa, qabanqaabinta riwaayadaha ama tolidida iyo naqshadaynta waxyaabo kala duwan. Halkan waxa kale oo aad ka heli kartaa muusiga, qoob ka ciyaarka iyo rinjiyeynta - ama waxaad la joogi kartaa dhalinyarada kale. Albaabka mar walba wuu u furan yahay waalidiinta dhallinta yar.

Talefoon: 031-366 40 95

limayl:

1200kvadrat@socialsydvest.goteborg.se

Bogga internetka:

goteborg.se/ungdomenshus

Cinwaanka: Mandolingatan 47,
Västra Frölunda

Hállplats: Frölunda Torg

Xarunta Öhålan

13-19 jir

Xarunta xilliga firaqada ee Öhålan waxay ku taal dugsiga Styrösö ee jaziiradaha koonfureed ee magaalada Göteborg. Waxaad u iman kartaa halkan si aad saaxiibo ula kulanto. Haddii aad hayso fikrad la xariirta waxa aad rabto inaad sameyso wakhtiga firaqada, waxaad sidoo kale ka heli kartaa caawimo halkan.

Waxaa laga yaabaa inaad ku hamminaysid inaad abuurto hawlo, aqoon-is-weydaarsi, LAN - ama wax gebi ahaanba ka duwan. Goobta Öhålan waxa kale oo aad ku ciyaari kartaa ciyaaraha wadajirka loo ciyaaro ee kala duwan, samaynta farsamada gacanta, filin-habeeneed, dhagaysan kartaa muusig aadna ka iibsan kartaa macmacaan makhaayadda. Waxa kale oo jira goob jimicsi oo aad u isticmaali karto dhaqdhaqaaqyada isboortiga ee kala duwan.

Albaabka mar walba wuu u furan yahay waalidiinta dhallinta yar.

Talefoon: 0702-65 35 59

Bogga internetka: goteborg.se/ohalan

Cinwaanka: Brattenskogen 14

Hawlaha qabsomaya xilliga fasaxa

Bilaash!

Inta lagu jiro fasaxa dugsiga, waxaa jira waxqabadyo xiiso leh oo loogu talagalay carruurta iyo dhalinyarada labadaba. Eeg bogga waxqabadyada fasaxyada ama jadwalka magaalada Göteborg si aad u aragto waxa socda.

Bogga internetka:

goteborg.se/lovaktiviteter



Is hawl-geli sidii qof wayn oo muhiim ah

Xarunta Hälsoteket

Da' walba

Bilaash!

Xarunta caafimaadka ee Hälsoteket waxay u jirtaa si adiga ku nool degmada aad u wanaajiso caafimaadkaaga iyo kan dadka kale. Annaga waxaad naga heli kartaa la-talin caafimaad, ka qaybgeli kartaa casharro, dhaqdhaqaaq jireed ama iska-diiwaangelin kartaa koorsooyin. Adiga oo ah waalid leh caruur yar-yar, xarunta caafimaadka ee Hälsoteket waxay kuu qabanqaabisaa waxyaabo ay kamid yihiin la tamashlaynta gaariga carruurta, wadahal ku saabsan talooyinka la xariira noloshu maalinle ah iyo dhiirigelin. Dhammaan hawlaha xarunta caafimaadka ee Hälsoteket waa bilaash waxaana laga heli karaa meelo kala duwan oo ku taala xaafadaha koonfurta-galbeed ee magaalada Göteborg, sida guriga dhaqanka ee Frölunda. Waxaad ka heli doontaa barnaamijyadayada mareegta.

Talefoon: 031-366 28 64

Bogga internetka:

goteborg.se/halsoteketvaster

Cinwaanka: Frölunda Kulturhus, Valthornsgatan 13, Västra Frölunda

Maxaaddada: Frölunda Torg

Noqo hagaha caafimaadka

Bilaash!

Ma xiisaynaysaa inaad wax badan ka barato caadooyinka qaab nololeedka mana dooneysaa inaad isbedel ku samayso caafimaadka dadka kale? Mise waxaad dooneysaa caawinta hagayaasha kale ee caafimaadka si ay kuusoo gaarsiiyaan macluumaadka caafimaadka? Xarunta caafimaadka ee Hälsoteket waxaa lagu tababaraa dadka raba inay taageeraan, ku dhiirgeliyaan kuna bogaadiyaan caafimaadka wanaagsan dadka degan xaafadaha koonfurta-galbeed ee magaalada Göteborg. In la ahaado hagaha caafimaadka ugu horayn waa shaqo iskaa wax u qabso ah oo ka bilaabmaysa koorsada cuntada, hurdada, walbahaarka, jimicsiga iyo waxyaabaha kale ee saameeya caafimaadka. Tababarku waa lacag la'aan, si aad u soo xaadirtana waxaa laga rabaa in aad degan tahay ama aad ka shaqeyso xaafadaha koonfurta-galbeed ee magaalada Göteborg iyo in aad af-iswiidhishka fahmeyso, si kastaba ha ahaatee waxaan sidoo kale jecelnahay in aad haysato af hooyo oo aan ahayn iswiidhishka.

Talefoon: 031-366 26 88

Iimayl: halsoguide@socialsydvast.goteborg.se



U lugey amni ahaansha Tynnered

Xaafadaha Tynnered waxa ka jira laba kooxood oo lugeeya, la kalana yiraahdo habeen-lugeyaasha Tynnered iyo Amni-u-lugeyaasha Waqoyiga Tynnered. Ujeedada socodka waa in la kordhiyo amniga iyadoo dadka waaweyni ay ka muuqdaan dibadda. Haddii aad xiisaynayso ka qaybqaadashada ama aad rabto inaad wax badan ka ogaato, fadlan nala soo xidhiidh.

limayl:

norrattynnered@nattvandring.nu



Samay urur ama kamid noqo mid

Degaanada Koonfurta Galbeed ee magaalada waxaa ka jira nolol urureed oo hodan ah oo leh waxqabadyo oo ay kujiraan sida isboortiga iyo jimicsiga ilaa dhaqanka iyo muusigada. Ma rabtaa inaad la xidhiidh la samayso urur ama aad samaysato urur cusub ama shabakad xidhiidh oo cusub? Lasoo wadaag fikradahaaga mid ka mid ah isuduwayaasha ururada. Waxa kale oo suurtoagal ah inaad u dalabto kaalmo taageero ururkaaga.

Talefoon: 031-366 04 86 ama
031-366 41 70

limayl: foreningsstod@socialsydvest.
goteborg.se

Xajiso lookal

Magaalada Göteborg, waxaa ku yaal goobo badan oo isboorti iyo lookalo kulan oo shaqsiyaad gaar ah, ururo ama shirkado ay xajisan karaan una isticmaali karaan ciyaaraha ama munaasabadaha kale. Bogga internetka, waxaad ka akhrisan kartaa wax badan oo ku saabsan sida loo xajisto adeegga cusub ee elektaroonigga ah.

Talefoon: 031-368 20 00

limayl:

idrottoforening@ioff.goteborg.se

Bogga internetka:

goteborg.se/bokaanlaggning



Amaaho qalabka xilliga firaqada iyo qalab-ciyaareed

Bangiga xilliga firaqada ee Frölunda

Da' walba

Bilaash!

Goobta loo yaqaanno bangiga xilliga firaqada ee Frölunda Torg, qof kastaa wuxuu ka amaahan karaa ciyaaraha iyo qalabka xilliga firaqada oo gebi ahaanba bilaash ah 14 maalmood. Waxa kale oo aad keeni kartaa saacadaha aan furannahay qalabka ciyaaraha iyo qalabka xilliyada firaqada ah oo aadan isticmaalin. Fadlan booqo boggayaga ee Facebook, halkaas oo aad ka heli doonto warar, saacadaha aan furannahay si ku meel gaar ah iyo macluumaad ku saabsan bangiga xilliga firaqada oo ku yaala fagaaraha Frölunda. Bogga internetka waxaad sidoo kale ka arki kartaa waxa ku harsan bakhaarkeenna. Ha ka waaban inaad nalasoo xidhiidho haddii aad wax su'aalo ah ama fikir ah qabtid.

Telefoon: 070-743 58 28

Iimayl: frolundatorg@fritidsbanken.se

Bogga internetka: fritidsbanken.se
Ka raadi "Hel kaydkaaga xilliga firaqada"

Cinwaanka: Frölunda Torg köpcentrum

Maxaaddada: Frölunda Torg



Maktabadda qalab-ciyaareedka ee Högsbo

Da' walba

Bilaash!

Halkan adiga iyo ilmahaagu waxaad ka amaahan kartaan alaabta ay ku ciyaaraan intii aad iibsansahaydeen kuwo cusub. Waxaan heynaa ciyaaro madadaalo leh, shax, looxyada la is-gelgeliyo, tareen, leegada, dharka lebiska iyo wixii lamid ah, iyo waxyaabo badan oo loogu talagalay carruurta iyo dadka waaweyn oo ay ku wada farxi karaan. Halkan waxa kale oo aad keeni ama soo ka qaadan kartaa dharka carruurta ee cabbirro kala duwan leh.

Iimayl:

leksaksbiblioteket.hogsbo@gmail.com

Bogga internetka:

torpadammensvanner.se

Cinwaanka: Cinwaanka saxda ah waxaad ka heleysaa Bogga internetka qaybta maktabadda qalab-ciyaareedka Högsbo hoosteeda.

Jimcsiga, ciyaaraha iyo goobaha ciyaaraha

Wadooyinka jimcsiga

Bilaash!

Magaalada Göteborg waxaa ka jira dhowr waddo oo jimcsiga ah oo wanaagsan lehna jid iftiin leh, oo ay kamid yihiin goobaha la yiraahdo Ruddalen iyo Pålvelund. Waxaad ka heli doontaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan iyaga iyo jidadka jimcsiyada ee kale.

goteborg.se/motionsspar.

Goobta Ruddalen

Waa aag weyn oo cagaar ah oo leh dariiqyo dabiici ah iyo jidad jimcsiga oo iftiin leh oo 2.2 kiiloomitir ah kuna hareeraysan yihiin buuro dhagaxyo ah iyo kaynta geedaha leh caleenta dhuuban. Aaggaas waxa kale oo ku yaal meel aragga u fiican iyo qalcado qadiimi ah. Bartamaha aaggaas waxaa ku yaal xarun isboorti.

Maxaaddada: Fyrktoget, Musikvägen, Kavåsvägen

Xarunta jimcsiga ee Pålvelund

Waxaa ku dhegan xarunta jimcsiga ee Pålvelund meel dabeeci ah oo qurux badan iyo meel bannaan ah oo aad ku socon karto ama aad ku ordi karto waddooyinka jimcsiga oo dhererkoodu kala duwan yahay - laga bilaabo 1.7 kiiloomitir (jid iftiin koronto leh) ilaa 6.2 km.

Cinwaanka: Redegatan 18, Västra Frölunda

Maxaaddada: Tranered

Harada Sisjön

Waxaa jira waddo jimcsiga oo iftiin leh oo dhan 2.4 kiiloomitir. Wixii socod dheer ah, waxaad kusii socon kartaa ilaa Oxsjön oo leh jid wareeg ah oo qiyaastii ah 7 kiiloomitir. Labadaba harooyinka Sisjön iyo Oxsjön waxaa jira suurtogalnimo ah in wax lagu dubto.

Maxaaddada: Askims Svartmosse
Ikhtiyaaro badan oo ku saabsan wadooyinka jimcsiga ama wadooyinka socodka oo aan lahayn jid iftiin koronto ayaa laga heli karaa gudaha ciwaanka dabiici-xasuuseedka.



Jimicsiga dibadda

Bilaash!

Koonfurta-galbeed ee magaalada Göteborg waxaa jira dhowr jimicsi oo bannaanka ah oo loogu talagalay kuwa jecel inay ku jimicsadaan mashiinnada bannaanka iyagoo joogo hawada nadiifka ah. Mashiinnada waa sahlan yihiin in la isticmaalo, ama waxaad kor u qaadaysaa jirrid-geedka, xadhkaha iyo miisaannada ama waxaad isticmaalaysaa miisaanka jidhkaaga si iska caabin ah oo kale.

Waxaad ka heli doontaa jimicsiga dibadda goobahaan soo socda:

- » Beerta Bergkristallparken
- » Kastanjeallén
- » Xaafadda Melongatan
- » Goobta Ruddalen
- » Dabaasha ee Askimsbadet
- » Beerta Positivparken

Macluumaad ku saabsan goobta jimicsiga dibadda ee magaalada Göteborg iyo maabka si aad halkaas u hesho waxaad ka heli kartaa bogga internetka.

Talefoon: 031-365 00 00 (Göteborgs Stads kontaktcenter)

Bogga internetka: goteborg.se/utegym



Goobaha dalxiis-ciyaareedka

Göteborg waxaa ku yaal goobo badan oo lagu ciyaaro iyo goobo dalxiis oo waaweyn oo ay carruurta iyo dadka waaweyni ku wada ciyaari karaan. Si aad wax badan u akhrido, waxaad tagi kartaa bogogga internetka ee hoose ama waxaad soo dejisan kartaa app-ka la yiraahdo Lekplatsen Göteborg. Waxaa laga heli karaa meelaha appab-ka laga helo iyo bogga leplatsappen.se.

Bogga internetkaer:

goteborg.se/lekplatser ama
goteborg.se/utflyktslekplatser

Beerta Positivparken

Da' walba

Bilaash!

Beerta Positivparken waa mid ka mid ah goobaha dalxiiska ee Göteborg. Halkan, goobta ciyaarta waxay u qaybsan tahay laba goobood oo beerta ah. Xarunta dhaqanka ee Frölunda waxaa ku yaal qaybta jimicsiga iyo meesha sare ee dabaasha ee lagasoo boodo.

Gudaha fog ee beerta, dhanka Ruddalen iyo dugsiga Frölunda waxaa ku yaal goob lagu ciyaaro oo leh moawduuc degaan beereed ah oo loogu talagalay carruurta yaryar. Halkan sidoo kale ku yaala goobta Positivet.

Goobta Positivet waa goob-ciyaareed iyo goob kulan oo shaqaale leh oona ku taala Beerta Positivparken. Halkan, ilmahaagu waxa uu ka amaahan karaa alaabta ay ku ciyaaraan waxaana ay ka qayb qaadan karaan hawlo kala duwan, kuwaas oo dhamaantood bilaash ah. Halkan waxaad ku duban kartaa meelaha wax lagu dubto ee furan waxaana geli kartaa musqulaha.

Beerta Positivparken waxaa ku yaala:

- » Jimicsi
- » Roogga lagu boodboodo
- » Garoonka Caqabadda ee lagu ciyaaro
- » Garoonka kubbadda kolayga
- » Tababarka xirfadaha dhaqdhaqaaqa
- » Meelaha laga sibixixo
- » Sanduuqa ciidda ee carruurta ku ciyaaraan
- » Jimicsiga dibadda
- » Meelaha wax lagu dubto

Agagaarka Beerta ee Positivparken waxaa ku yaala:

- » Garoonka Kubadda Cagta
- » Garoonka kubbadda laliska ee xeebta
- » Meelaha wax lagu dubto

Talefoon (Positivet): 031-366 04 80

Bogga internetka:

goteborg.se/positivparken

Maxaaddada: Positivgatan ama Frölunda Torg

Cinwaanka: Positivgatan 7 / Mandolingatan 47, Västra Frölunda

Beerta Bergkristallparken

Da' walba

Bilaash!

Beerta Bergkristallparken waa goob kulan oo ku taal Tynnered oo bixisa waxqabadyo madadaalo leh oo da 'kasta ah. Guriga beerta waxaad ka heli doontaa meel kafateeriya ah oo fudud, halkaas oo aad kula qaxwayn karto dhammaan qoyska ama asxaabta. Halkan waxaad ku ciyaari kartaa ciyaaraha wadajirka loo ciyaaro, samaynta farsamada gacanta, akhrinta buugaagta, ama waxaad samayn kartaa hawlo adiga kuu gaar ah adigoo kaashanaaya shaqaalaha ama ururada.

Beerta Bergkristallparken waxa kale oo yaala:

- » Aagga dhaqdhaqaaqa oo dhan 460 mitir oo laba jibbaaran oo loogu talagalay in barafka lagu socdo, ku socoshada BMX, ciyaaraha rollerblades-ka ama baaskiil laadka.
- » Garoonka kubbadda kolayga
- » Garoonka kubadda cagta
- » Masrax
- » Meel beerashada loogu talagalay
- » Guriga beerta oo shirar loo qabsan karo, aqoon-is-weydaarsiyo ama kulanno kale.

Talefoon: 031-365 00 00 (Göteborgs Stads kontaktcenter)

limayl: bergkristallparken@sydvast.goteborg.se

Bogga internetka:
goteborg.se/bergkristallparken

Cinwaanka: Bergkristallparken 1,
Västra Frölunda

Maxaaddada: Beryllgatan
Bergkristallsgatan



Hawlaha ciyaareed ee kale

Xarunta ciyaaraha ee Ruddalen

Xarunta isboortiga ee Ruddalen waxaad ku socon kartaa barafka. Halkaan waxaa ku yaal hoolka baraf ee lagu ciyaaro oo adiga iyo cunugaaga aad sidoo kale ku ciyaari kartaan ciyaaarta xeegada barafka. Bisha Maarso 2023, hoolka Skinnarehallen ee xarunta ciyaaraha ee Ruddalen ayaa la filayaa inuu diyaar noqoto, halkaas oo aan xeegada la isticmaali doonin. Saacadaha uu furanyahay ee hadda shaqeeo waxaa laga heli karaa bogga internetka. Kabaha barafka lagula socdo waxaa laga kireysan karaa goobta.

Talefoon: 031-368 20 70

Bogga internetka: goteborg.se/ruddalen

Cinwaanka: Musikvägen 55,
Västra Frölunda

Maxaaddada: Musikvägen

Hoolka barafka ee Askim

Hoolka barafka ee Askim wuxuu ku haboon yahay adiga raba inaad caruurtaada gudaha hoolka barafka ku ciyaaraan. Saacadaha uu furanyahay iyo macluumaadka kale, booqo bogga internetka.

Talefoon: 031-368 20 72

Bogga internetka:
goteborg.se/akaskridskor

Cinwaanka: Kruniusvägen 1, Billdal

Maxaaddada: Hästebäck

Tenniska miiska ee dugsigta Slottsberg

7-12 jir

Bilaash!

Soo qaado kabaha gudaha iyo caagad biyo ah, dhammaan carruurta waa la soo dhaweynayaa!

Gabdhaha waa Arbacada saacadda markay tahay 18-19

Wiilashana waa Arbacada saacadda markay tahay 19-20

Waqtiyadaan hore waxaa laga yaabaa inay isbedelaan, la xiriir waxqabdka wixii macluumaad ah ee markaa jira.

Talefoon: 0736-66 27 90



Lindens_fritidsverksamhet

Dalladda ciyaaraha dadka naafada ee Göteborg

Anagoo ah Dalladda ciyaaraha dadka naafada ee Göteborg waxaan diiradda saaraynaa ururadeena. Waxaan rabnaa inaan noqono taageerada iyo cudud gacantooda fidsantahay oo ay u baahan yihiin si ay u horumariyaan waxqabadkooda, u kordhiyaan xirfadaha hogaamiyayaashooda oo ay caruur iyo dhalinyaro cusub ugu qortaan ciyaaraha naafada. Adigoo u maraaya Dalladda ciyaaraha dadka naafada waxaad ka heli kartaa ururo badan oo ku xiran Dalladda ciyaaraha dadka naafada, kuwaas oo hawlo u qabta carruurta iyo dhalinyarada naafada ah.

Talefoon: 031-43 22 56

Iimayl: kansliet.vg@parasport.se

Bogga internetka: www.parasportgbg.se

Dabbaal iyo dabeecadda

Dabaasha gudaha

Dhammaan carruurta da'doodu u dhaxayso 0-8 jir si bilaash ah ayay ugu dabbaalanayaan Göteborg. Kharashyada gelitaanka hadda ee kuwa da'doodu tahay 8-18 sano, ardayda, hawlgabka iyo dadka kale ee waaweyn waxaa laga heli karaa bogogga internetka ee ay dabbaal kasta leedahay. Haddii aad u xiisaynayso ilmahaaga dugsiga dabaasha, waxaad la hadli kartaa hoolka dabaasha ee kuugu dhow wayna ku caawin doonaan.

Dabbaasha Frölunda

Dabbaasha Frölunda waxay ku taal guriga dhaqanka ee Frölunda. Halkaan waxay leedahay barkad dabbaal oo 25 mitir ah, munaaradda quusitaanka, meesha dabbaasha sare ee lagasoo boodo, barkadda dabbaasha lagu barto, qaybta jimicsiga ee biyaha, barkadda dabaasha ilmaha iyo qolka la isku kululeeyo. Halkan ilmahaagu yar wuxuu aadi karaa dabbaasha dhallaanka. Waxaa jira dugsi dabaasha oo loogu talagalay dadka waaweyn iyo carruurta labadaba, waad ciyaari kartaan oo aadna tijaabin kartaan tababarka biyaha. Saacadaha furitaanka, qiimaha iyo macluumaadka kale waxaa laga heli karaa bogga internetka.

Talefoon: 031-368 22 80

Bogga internetka:
goteborg.se/frolundabadet

Cinwaanka: Valthornsgatan 13,
Västra Frölunda

Maxaaddada: Frölunda Torg

Hoolka dabaasha ee Askim

Hoolka dabaasha ee Askim wuxuu leeyahay hal barkad oo 25-mitir ah, qolka la isku kululeeyo iyo jimicsi oo ku dheggaan hoolka ciyaaraha. Saacadaha furitaanka iyo macluumaadka kale eeg bogga internetka.

Talefoon: 031-368 22 30

Bogga internetka: goteborg.se/askimssimhall

Cinwaanka: Gärdesvägen 5, Askim

Maxaaddada: Askimsbadet

Hoolka dabaasha ee Styrso

Hoolka dabaasha ee Styrso waa hool dabbaal oo yar oo horay loo sii ballansan karo. Barkadu waa 8x12 mitir oo qoto dheerkeedana yahay 70-115 cm. Halkaan waxaa lagu qabanqaabiyaa iskuulka dabaasha waxaa soo qabanqaabiya SLS (Ururka Naf-Badbaadinta ee Swiidhan) waxaad kaloo u kireysan kartaa hoolka dabaasha xafladaha carruurta.

limayl: styrso.simhall@grundskola.goteborg.se

Bogga internetka:
goteborg.se/styrsosimhall

Saacadaha ay hadda furan yihiin hoolalka dabaasha iyo si aad u heshid meelo badan oo lagu dabaasho, booqo bogga goteborg.se iyo "Dabbaal iyo hoolalka dabbaasha" ama soo degso app-ka magaalada Göteborg "Badplatsen Göteborg".

Ku dabbaalo dibadda

Bilaash

Xeebta iyo bannaanka jasiiradaha Koonfurta-galbeed ee Göteborg waxaa ku yaal dhowr meel oo dabbaal-badeed ah oo wanaagsan. Inta lagu jiro xilliga xagaaga ee dabbaasha, waxaa jira musqulo dhammaan goobaha dabbaasha ah oo furan maalin kasta. Qalabka nafta lagu badbaadiyo ayaa laga heli karaa meelaha lagu dabbaasho sida qoraalka lagu sheegay.

Maadaama dad badan ay bilaabeen dabaasha xilliga jiilaalka, baahida loo qabo macluumaadka ku saabsan heerkulka biyaha dabbaasha ee markaa jira ayaa kordhay. Sidaa darteed, qalabka cabbir-qaadaha ah ee hadda jira waa dijital si aad isla markiiba u ogaato heerkulka biyaha dabbaasha mid ka mid ah meelaha lagu dabbaasho ee magaalada. Waxaad ka heli kartaa heerkulka dabbaasha ee hadda jira app-ka Badplatsen app iyo bogga internetka ee badplatsappen.se.



Ururka Naf-badbaadinta ee Iswiidhan ee Göteborg wuxuu qabanqaabiyaa dugsiyo dabaal oo laga heli karo meelo badan oo dabaal leh inta lagu jiro xagaaga. Waxaad macluumaad dheeraad ah ka heli kartaa bogga slsgoteborg.se

Waxaad ka heli kartaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan musqulaha bannaanka ee Göteborg, bartan goteborg.se/hittabad



Dabbaal gelideeda la waafajiyay baahiyaha



Eeyaha waa mamnuuc inta lagu jiro xilliga dabbaasha



Musqul gelideeda la waafajiyay baahiyaha



Ey waa la oggolyahay



Dabbaasha Askim

Mid ka mid ah meelaha ugu caansan ee lagu dabbaasho ee Göteborg oo leh bacaad-xeebeed oo dheer iyo meelo caws leh oo lagu fara-ciyaaro, ciyaaraha iyo goob dabbaal oo qoraxda ku aadan. Halkan waa aad ku qorraxaysan kartaa oo aad ku dabaalan kartaa geeska dabbaasha ee dhererkiisu yahay 259 mitir, wado tiir leh ilaa xeebta bacaadka ah ayaa u sahlaya isticmaalayaasha kursiga curyaanka inay ku dabaashaan.

Maxaaddada: Askimsbadet



Goobta dabbaasha ee Aspholmen (Saltholmen)

Goobta dabaasha ee Aspholmen, waxaad ku dabaalan kartaa adigoo kasoo boodaya dhagaxyada ku hareereysan ama waxaad isticmaali kartaa jaranjarooyinka dabbaasha. Maxaaddada waxaa ku yaal dukaan.

Maxaaddada: Saltholmen.



Goobta dabbaasha ee Sisjön

Goobta dabbaasha ee Sisjön waxay ku ag taal Stora Sisjön oo ku dhagan aagga dabiiciga ah. Halkaan waxaa ku yaal jaranjarooyinka dabbaasha, xeebaha bacaadka ah, cawska, dhagax-buureed, meelaha wax lagu dubto iyo dukaan. Waxa kale oo ku yaal meel xayndaab leh oo ay carruurta yaryari si ammaan ah ugu dabaalan karaan harada dhexdeeda.

Maxaaddada: Askims Svartmosse

Goobta dabbaasha ee Fiskebäck

Goobta lagu dabbaasho waxay ku dhowdahay dekedda doomaha yaryar ee Fiskebäck. Halkan waxa aad ka heli kartaa dhagax-buureedyo dabbaal oo adiga kuu gaar ah, haddii aadan doorbideynin xeebta ama kaabadda. Maqaaxi iyo dukaanno ayaa ku yaala.

Maxaaddada: Fiskebäcks småbåtshamn

Goobta dabbaasha ee Ganlet

Dhinaca konfurta-galbeed ee magaalada Göteborg waxaa ka jira dabeecado badan oo kala duwan. Halkan waxa aad ka heli doontaa kaymo, meelo jardiinooyin ah, dhagax-buureedyo, dhul-daaqsiineed iyo xeebo lagu socdo, lagu nasto, meelo la fuulo, lagu tamashleeyo ama lagu ciyaaro. Bogga internetka waxaad ka heleysaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan aagagga dabiiciga ah ee Göteborg.

Maxaaddada: Haleskärsgatan.



Goobta dabbaasha ee Näset

Waa goob dabbaal oo aad loo jecel yahay lehna bacaad-xeebeed aad u fiican oo ay ku hareereysan yihiin dhagax-buureedyo waaweyn. Halkan waxaa ku yaal saxgad-bireed oo lagu qorraxaysan karo iyo tiirar leh jaranjarooyinka dabbaasha. Sido kale waxaa ku yaal dukaan iyo maqaayad. Eeyaha waa ka mamnuuc inta lagu jiro xilliga dabbaasha.

Maxaaddada: Näsbovägen



Jaan-dhuleedka Smithska ee Smithska udden

Jannada dabbaasha ee dadka reer Göteborg u yaqaanaan Smitten. Halkaan wuu ugu yaalaa boos dad badan dhinaca dhagax-buureedyada, xeebaha iyo meelaha cawska leh. Dhanka koonfurta-galbeed ee "Smitten" dad badan ayaa ku dabbdhaasha iyagoo qaawan.

Maxaaddada: Näsbovägen.



Goobta dabbaasha ee Styrso Bratten

Styrso Bratten, waxaad ka dabaalan kartaa lagasoo bilaablo xeebta ama kaabadda, qiyaasti meel 300 mitir u jirta maxaaddada doonta, meeshaas oo ay ku yaalliin dukaan iyo makhaayad. Ka digtoonow - biyuhu waxay u shubmaan jihada biyo-mareenka!

Maxaaddada: Styrso Bratten (doon).



Goobta dabbaasha ee Styrso Uttervik

Meel murux ah, laakiin ubaxaysan oo leh xeeb yar oo loogu talagalay carruurta yaryar iyo jasiirad dabbaal oo leh saxgad-jiif ah iyo jaranjaro dabbaal oo loogu talagalay carruurta waaweyn.

Maxaaddada: Styrso Tängen (doon).



Dabbaasha Lilla Amundön

Dabbaasha Lilla Amundön waa dabbaal bannaanka ah oo loogu talagalay dadka naafada ah, kuna taal degmada Askim ee Koonfurta magaalada Göteborg. Waxaa jira dabbaal hawo furan ah iyo barkad biyaha kulul ah labadaba. Dabbaasha waxay furmaysaa 1da Juun, waxayna xidhmaysaa 31da Agoosto.

Talefoon: 031-368 22 46

Bogga internetka:

goteborg.se/lillaamundonsbad



Dareen-xasuuseedyada dabeecadda

Bilaash!

Dhinaca konfurta-galbeed ee magaalada Göteborg waxaa ka jira dabeecado badan oo kala duwan. Halkan waxa aad ka heli doontaa kaymo, meelo jardiinooyin ah, dhagax-buureedyo, dhul-daaqiineed iyo xeebo lagu socdo, lagu nasto, meelo la fuulo, lagu tamashleeyo ama lagu ciyaaro. Bogga internetka waxaad ka heleysaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan aagagga dabiiciga ah ee Göteborg.

Bogga internetka:

goteborg.se/naturomraden

Beerta Billdal

Beerta Billdal waxaa ku yaal jidadka farasyada iyo waddooyin lagu socdo oo dhex mara kayn waqti badan jirta oo qurxoon. Qaybta furan ee beerta waxay leedahay garoon-ciyaareed iyo roog caws ah, halkaas oo aad ku tamashlayn karto bay'ad goob beered duug ah.

Maxaaddada:

Norr - Hästebäck Söder - Billdals gård

Jasiiradda wayn ee Stora Amundön

Jasiiradda weyn ee Amundön waxay leedahay meel lagu quuso oo badda dhexdeeda ah, dabaasha dhagax-buureedyada oo badan iyo bacaad-xeebeed yar yar. Jid dabiici ah oo buuraley ah oo qiyaastii 4.5 kiiloomitir ah ayaa ku wareegsan jasiiradda iyada oo sii marta kaymaha geedaha iyo cawska xeebta.

Maxaaddada: Brottkärr



Kaynta qalcadda ee Slottskogen

Kaynta qalcadda ee Slottskogen waxay leedahay caws waaweyn laakiin sidoo kale leh dhul buuraley ah oo leh kayn badan iyo nolosha xoolaha. Sidoo kale halkaan waxaa ku yaal xanaano ay ku jiraan xayawaanada Waqooyiga Yurub sida goodirka, deerada iyo fardaha.

Maxaaddada: Botaniska trädgården, Linnéplatsen ama Majvallen

Beer cawseedka buuraha ee Änggårdssbergen

Beer-cawseedka buurta ee Änggårdssbergen waa meel kayn ah oo leh dooxooyin, geedo gaaban oo siman iyo harooyin. Wadooyin badan oo laami ah iyo dariiqyo dabiici ah ayaa dhex mara aagga. Mid ka mid ah jidadka loo maro Beer-cawseedka buurta ee Änggårdssbergen waa iyada oo la sii marayo beerta dhirta ee Botaniska trädgården.

Maxaaddada: Botaniska trädgården

Buurta Skärvallsberget

Socodka dheer ee 4.5 km ah ee ka bilaabanaya Hinholmen kuna socda kaabadda Önnared ee koonfurta, waxaad ka gudbaysaa buuro, meelo yar oo ka bannaan kaynta dhexdeeda, gacan-biyood dabbaal iyo dekedaha doomaha. Laga soo bilaabo dekedda doomaha ee Hinsholmen oo ahayd goob dabbaal oo furan ilaa 1950-meeyadii, waxaa mara jaranjaro ilaa waddo jeex ah oo dhex marta Skärvallsberget.

Korka buurta waxaa ku yaal muuqaal cajiib ah oo ku saabsan jasiiradaha koonfureed. Dildilaaca buuraha waxaa ka mid ah oo ku yaala Lindalen iyo hoosteeda oo ay ku yaalaan gacan-biyoodyo xeebaha yar yar. Xeebta waxaa ku yaal biyo kalluumeysi oo wanaagsan.

Maxaaddaer: Hinsholmen ama Fiskebäcks småbåtshamn

Aagga qoyan ee Välen

Aagga qoyan ee Välen waa kayd dabiici ah oo xiiso leh oo leh taariikh qani ah. Raac jidka dabiiciga ah oo ku wareeg wakhti xaadirkan iyo wakhtiyadii horeba. Aagga qoyan ee Välen waxaa ku yaal taallooyin qadiimi ah oo laga soo bilaabo xilligii boroons-ka, waxaadna minaaradda shimbirta ka fiirin kartaa shimbirta loo yaqaan sare-ha, shaabuugyada iyo shimbirta af-dhuubta. Munaaradda shimbiruhu waxa ay leedahay meel lagu fuulo kuraasta curyaamiinta iyo baabuurta la dhigto.

Maxaaddada: Kanneböck


Beerta Ängholmsparken

Beerta Ängholmsparken waxay ku taal inta u dhaxaysa Längedrag iyo Saltholmen waxayna leedahay geedo badan oo qurxoon sida geedka tiliyaanka, geedka kastaniyada iyo geedka caleen-weynaha. Waxa kale oo jira halkan garoonka ciyaarta tenniska ee loogu talagalay dadweynaha.

Maxaaddada: Roddföreningen



Khariidad – Hawlo iyo goobaha dalxiiska



Dugsiyada Xannaanada ee furan

1. Dugsiga Xannanada furan ee Axel
2. Dugsiga Xannada furan ee Opalorget
3. Dugsiga Xannaanada furan ee Trädet

Dhaqanka iyo Maktabadaha

4. Guriga dhaqanka ee Frölunda
5. Xarunta Guriga Axel
6. Maktabadda Frölunda
7. Maktabadda Askim
8. Maktabadda Högsbo
9. Maktabadda koonfurta skärgården
10. Maktabadda Opalorget

Goobaha kulamada iyo waxqabadyada xilliyada firaqada

11. Xarunta Mellangården
12. Hawlaha xilliga firaqada ee Linden
13. Hawlaha xilliga firaqada ee Axelhuset
14. Lookalka 426
15. Xarunta xilliga firaqada ee Pilen
16. Xarunta Öhålan
17. Guriga dhalinyarada ee 1200 kvadrat

Dhabbaha jimicsiga, jimka dibadda, goobaha dalxiiska iyo hawlaha jimicsiyada

18. Goobta Ruddalen
19. Xarunta jimicsiga ee Påvelund
20. Harada Sisjön
21. Beerta Bergkristallparken
22. Kastanjeallén
23. Melongatan
24. Dabbaasha Askim
25. Beerta Positivparken

26. Xarunta ciyaaraha ee Ruddalen
27. Hoolka barafka ee Askim
28. Teeniska miiska ee dugsiya Slottsberg

Dabbaal

29. Dabbaasha Frölunda
30. Hoolka dabbaasha ee Askim
31. Hoolka dabbaasha ee Styrös
32. Dabbaasha Askim
33. Goobta dabbaasha ee Aspholmen (Saltholmen)
34. Goobta dabbaasha ee Sisjön
35. Goobta dabbaasha ee Fiskebäck
36. Goobta dabbaasha ee Ganlet
37. Goobta dabbaasha ee Näset
38. Smithska udden
39. Goobta dabbaasha ee Styrös Bratten
40. Goobta dabbaasha ee Styrös Uttervik
41. Dabbaasha Lilla Amundön

Dabeecadda

42. Beerta Billdal
43. Jasiiradda wayn ee Stora Amundön
44. Buurta Skärvalsberget
45. Aagga qoyan ee Välen
46. Buurta Änggårdsberget
47. Beerta Ängholmsparken

Talo iyo Taageero

Mararka qaarkood nolol carruur wadata ma fududa. Kaalmada, talada iyo taageerada dadka kale waa xuquuq aad awoodid ayna tahay inaad u isticmaasho dantaada iyo tan carruurta. Ma jiraan su'aalo ama dhibaato aad u weyn ama yar. Waxaa jira dad badan oo xaafaddaada ah oo raba inay adiga iyo qoyskaaga kaa caawiyaan dhamaan xaalad kala duwan.

Halkan waxa aad ka heli doontaa macluumaad ku saabsan hawlo kala duwan oo ku siinaya taageero waalid ahaan iyo ilmahaaga ama qof dhallinyaro ah. Haddii ay kula noqoto inay adagtahay inaad hesho mid sax ah, waxaad la xidhiidhi kartaa mid ka mid ah waxqabadyadeenna hoose, wayna ku hagi doonaan.

Xafiiska muwaadiniinta

Ku soo dhawoow xafiiska muwaadinka ee xarunta dhaqanka ee Frölunda. Halkaan waxaad si fudud uga heli kartaa jawaabaha su'aalahaaga ku saabsan waxqabadka degmada, tusaale ahaan dugsiga xannaanada, dugsiga, taageerada waalidka iyo daryeelka dadka da'da ah ama xafiiska dowladeed ee ay tahay inaad kala xiriirto kiis. Uma baahnid inaad leedahay kiis si aad halkan u timaadid, waan ku faraxsanahay inaan dhagaysano aara'daada, fikradahaaga iyo aragtidaada. Waxqabadyo kala duwan ayaa sidoo kale laga abaabulaa halkan, sida qareenka heegan ah iyo muxaadaraad.



Telefoon: 031-365 00 41

Iimayl:

medborgarkontoret.frolunda@
demokratimedborgarservice.goteborg.
se

Cinwaanka: Valthornsgatan 13

Taageero ku socota waalidiinta

Taageerida waalidka ee ay bixiyaan xarumaha qoyska

Bilaash!

Annaga ayaa nasoo aadi kartaa haddii aad u baahan tahay talo iyo taageero la xariirta doorka waalidnimo, kobcinta awoodahaaga waalid ahaan ama aad hesho talooyin cusub oo fududayn kara nolol maalmeedka. Waalidiinta waxaan ula kulannaa si gaar ah, labo-labo ama kooxo-koox.

Macluumaadka xiriirka iyo macluumaad dheeraad ah waxaad ka heli kartaa bogga 1aad ee xarumaha qoyska.

Xafiiska adeegga bulshada ee koonfurta galbeed ee Göteborg

Da' walba

Bilaash!

Xafiiska Adeegga bulshada, waxaa adiga waalid ahaan ka heli kartaan talo iyo taageero adiga iyo ilmahaaga labadaba, si aad ugu noolaataan nolol ammaan ah oo madaxbannaan. Waxaanu ku siinaynaa taageero iyo ilaalin haddii aad, tusaale ahaan:

- » leedahay xaalad qoys oo cakiran.
- » ku sugan tahay xaalad qoys oo aad adiga ama qof kale halis ugu jirtaan waxyeelo
- » la kulantay ama aad aragtay rabshado
- » rabtid in laga caawiyo gacan ka hadalka la xariirka Dhibaatooyinka rabshadaha xigtada dhow



- » dhibaato kaa haysato khamriga, daroogooyinka ama qabatinka khamaarka
- » haddii aad qaraabo la tahay oo aad ka welwelsantahay qof kuu dhow oo qaba dhibaatooyinka balwadda
- » la xanuunsanaysid caafimaad darro dhimireed
- » ku hayso guri la'aan ba'an
- » dhibaato ku qabtid dembiyada aadna dooneysid in lagaa caawiyo ka bixideeda.

Xafiiska Adeegga bulshadu waxa ay sidoo kale ka shaqeeyaan ilaalinta iyo taageeridda carruurta iyo dhallinyarada la dhibaateeyo, waxayna baaraan warbixinnada ay soo gudbiyaan xafiisyada dowladda iyo shakhsiyaadka.

Xafiiska adeegga bulshada waxaad ka heli kartaa hawlahaan hoose:

Taageeridda waalidka – Hawlaha taageeridda

Loogu talagalay adiga leh carruurta da'doodu tahay 0-18 jir

Bilaash!

Waxaad iman kartaa halkan haddii aad hayso fikrado iyo su'aalo ku saabsan carruurta iyo waalidnimada. Waxaan leenahay sir-xejin mana diiwaan wax. Halkan, adiga waalid ahaan qof ayaad kala hadli kartaa haddii, tusaale ahaan, aad dareento inaad hubin sida ugu wanaagsan ee aad u taageeri karto ilmahaaga, ka welwelsan tahay sida ilmahaagu ugu sugan yahay dugsiga ama dugsiga xannaanada, khilaafyo badan uu kaala dhexeeya ilmahaaga, ama aadan guriga xaaladiisa u shaqaynayn sidaad rabto. Waxaad heli kartaa wicis ilaa 5 mar ah oo lacag la'aan ah oo aad wacaysid taageerayasha waalidiinta.

Waxaan sidoo kale bixinaa taageero waalid oo koox ahaan ah:

- » Taageerada waalidka ABC - dhammaan carruurta ayaa ahmiyad leh, loogu talagalay adiga leh carruur da'doodu u dhaxayso 3 iyo 12 sano jir.
- » Taageerada waalidka ee COS- Wareegga aamin-qabka, in la ahaado waalid, 0-6 sano.
- » Taageerada waalidka ee BiFF - Carruurta oo saaran diirada waalidka, loogu talagalay waalidiinta aan wada noolayn oo khilaaf ka dhexeeyo.

- » Taageerada waalidka ee LFT - Hogaaminta loogu talagalay waalidiinta dhallinyarada ah, waalidiinta u dareemaya walwal ilmahooda.

Talefoon: 031-366 42 12

Iimayl: foraldrastod@socialsydvast.goteborg.se

Bogga internetka: goteborg.se/foraldrastod

Carruurta iyo qoyska la qaabilay

Talefoon: 031-366 20 44 ama 031-366 41 02

Cinwaanka: Lergöksgatan 2, Västra Frölunda

Kaalmo-masruufidda dadka waa wayn

Lambarka heeganka: 031-366 23 80

Cinwaanka: Topasgatan 58, Västra Frölunda

Xafiiska gurmadka bulshada ee Göteborg

Bilaash!

Xafiiska adeegga gurmadka ee bulshadu waxa uu ku siinayaa gargaar degdeg ah fiidakkii, habeenadii iyo maalmaha fasaxa ah. Waxay noqon kartaa wax ku saabsan rabshadaha, xadgudubyada, degaanka ama haddii aad ka shakisan tahay in qof uu khatar ku jiro.

Talefoon: 031-365 87 00

Cinwaanka: Stora Badhusgatan 14, Göteborg

Taleefoonka waalidka

Bilaash!

Waalid ahaan ama qof weyn oo u dhow qof kuray ah ama qaangaar ah, waxaa wanaagsan karta inaad kala hadasho qof xirfadle ah fikradahaaga iyo walaacyadaada. Taleefoonka waalidka ee qaybta dhalinyarada waxaa loogu talagalay kuwa u baahan taageerada. Ma jiraan su'aalo aad u weyn ama aad u yar. Haddii kale oo aan ku caawin karin, meel ku caawin karta ayaan kuusii gudbineynaa

Sidaan buu u shaqeeyaa taleefanka waalidku:

- » Taleefoonka waalidka waxaa loogu talagalay waalidiinta, qaraabada iyo dadka waaweyn ee kale ee ku xeeran da'yarta iyo dhalinyarada.
- » Mashiinka jawaabta ee taleefoonka ayaa ka jawaabaya wicitaankaaga. Waxaad reebtaa fariin ka dibna waa lagusoo wacaa.
- » Soo wacayaashayadu waa shaqaale bulsheed oo khibrad leh, xejinta sirtana ku shaqeeya.
- » Caawimadu waa lacag la'aan.

Talefoon: 031-367 96 14

Fariin reeb oo ku saabsan waxa aad ka welwelsan tahay dib ayaan kuu soo wici doonnaa.

Bogga internetka:

goteborg.se/foraldratelefon



Xarunta Stella ee Göteborg

Bilaash!

Halkaan ayaa waxaad ka heli kartaa taageero marka ilmahaaga la geeyo meel ka baxsan gurigooda. Waalid ahaan, waxaad tahay qof muhiim u ah nolasha ilmahaaga, Stellana waxaad ka heli kartaa fursad aad uga hadasho xaaladaada meesha ay marayso. Halkan, shaqaaluhu waxay ku shaqeeyaan sir-xejin mana diiwaan geliyan wax.

Kuwa ka shaqeeya Stella waa maamulayaal arrimaha bulshada waxayna khibrad ballaaran u leeyihiin qaybaha kala duwan ee shaqada bulshada.

Stella waxaad ka heli kartaa:

- » Ka hadlidda sida aad dareemeyso.
- » Isku diyaarinta shirarka xafiiska adeega bulshada ee khuseeya ilmahaaga. Haddii aad rabto, waxaan sidoo kale kaala qaybgeli karnaa shirarka sidii hawl taageero ah oo kale.
- » Helidda Caawimo sidii aad u ilaalin lahayd xiriirka ilmahaaga, qoyska loo geeyay ilmahaaga, hoyga iyo wixii kale.
- » Helidda macluumaad ku saabsan xuquuqda iyo waajibaadka.
- » Caawinta la xariirta akhrinta baadhitaanada iyo dukumeentiyada kale ee khuseeya ilmahaaga. Shaqaalaha Stella waa kuu taageero adiga waalid ahaan. Way ku dhageysanayaan kuna hagayaan, waxay dhexdhexaad ka yihiin dhammaan dhinacyada oo cidna uma hadlayaan.

Talefoon: 031-366 21 38 ama 031-366 30 72

Haddii qofna ka jawaabi waayo taleefoonka, farriin ayaad reebi kartaa oo dib ayaa lagu soo wici doonaa.

limayl:

stella@socialsydvast.goteborg.se.

Bogga internetka:

goteborg.se/stellamottagningen

Cinwaanka: Cinwaanka saxda ah waxaad ka heleysaa bogga internetka.

La talinta qoyska

Da' walba

Qof walba dhibaato ayuu kala kulmi karaa xiriirkiisa. La-talinta qoyska ee magaalada Göteborg, adiga oo lamaane ah ama qoys ahaan waxaad heli kartaan caawimo si aad u heshaan fursado cusub iyo xal u helidda dhibaatooyinka iyo isku dhaca. Qof kasta oo ka shaqeeya la-talinta qoyska waxaa saaran waajibka sir-xejinta oo wax ma diiwaan gelinayaan. Adinka oo soo codsanaya waxaad noqon kartaa qarsoodi.

Talefoon: 031-367 93 63

Cinwaanka: Kronhusgatan 2F, Göteborg

Maxaaddada: Brunnsparken

Xafiiska sharciga ee qoyska

Haddii adinka waalidiinta ah aad ka fekereysaan inaad kala tagtaan oo aad baaritaan la xariira qofka mas'uuliyadda ilmaha lagu qoraya idiinka socota maxkamadda degmada, xafiiska sharciga qoyska wuxuu idinka caawin kara inaad heshiis gaartaan oo aad qorataan heshiis. Waxay sidoo kale qabtaan baaritaanada ka hor inta aan la keensanin carruurta la korsado, waxayna ku qaabilaan waalidiinta wadahal wadashaqeyn oo bilaash ah.

limayl: familjerattsbyran@socialcentrum.goteborg.se

Bogga internetka:
goteborg.se/familjerattsbyran

Cinwaanka: Olof Palmes Plats 1, Göteborg

Maxaaddada: Järntorget



Taageero ku socota xigtada

Taageerada xigtada

Da' walba oo ka yar 65 sano

Ma haysataa qof kuu dhow oo jirro, balwad, qabatinnimo, naafanimo jireed ama maskaxeed awgeed, u baahan taageeradaada? Markaa adiga qaraabo ahaan waxa kale u baahan tahay taageero.

Taageerada qaraabada ee magaalada Göteborg waxay bixisaa wadahal, kooxo qaraabo ah, tababaro, muxaadaro iyo hawlo caafimaad abuurid ah. Waxaa na saaran waajibbaad sir-xejinta ah mana qorno wax dukumeenti ah.

Talefoon: 031-365 50 30

limayl: anhorigstod.under.65@funktionsstod.goteborg.se

Bogga internetka:
goteborg.se/anhorigstodnaradig

Cinwaanka: Slottsskogsgatan 12

Maxaaddada: Jaegerdorffsplatsen ama Mariaplan

Xarunta xigtada ee koonfurta galbeed ee magaalada

Dadka leh xigto ka wayn +65 sano

Adiga taageeraya qof qaraabo tihiiin oo 65 jirsaday ayaa waxaa laga yaabaa inaad adigaba u baahato taageero.

Xarunta qaraabada ee ku taal Koonfurta Galbeed ee magaalada ayaa waxay u jirtaa inay ku xoojiyaan ka qaraabo ahaan iyagoo adeegsanaya wada joogga, aqoonta iyo dhaqdhaqaaq. Xarunta Qoyska ee Koonfurta-galbeed ee magaalada waxaad ka heli kartaa Xarunta dhaqanka ee Frölunda oo ku taal dhismahayaga La Bamba, oo aan la wadaagno Maamulka Dhaqanka.

Taageero ku tiirsan ayaa diyaar u ah adiga oo taageera qof qaba naafo, jir ama jirro maskaxeed ama kaliya da'da sare.

Taageeradu waxay ka kooban tahay, waxyaabo ay ka mid yihiin, kooxaha qaraabada, halkaas oo aad kula kulmaysid qaraabo kale oo xaalad isku mid ah ku jira, wada hadal taageero shakhsi ah, la-talin, muxaadaro iyo tababar.

Waxaa na saaran sir-xejin, dhammaan xiriirka lala yeesho la taliyaha qaraabada waa lacag la'aan.

Wixii macluumaad dheeraad ah, waxaad nala soo xiriiri kartaa adigoo wacaya xarunta xiriirka, weydiine lataliyaha qaraabada ee ka shaqeeya qaybta Koonfurta Galbeed ee magaalada.

Talefoon: 031-365 00 00

Iimayl:

anhorigstod.sydvast@aldrevardomsorg.goteborg.se

Cinwaanka: Valthornsgatan 3, Västra Frölunda

Maxaaddada: Frölunda Torg

Qaybta taageeridda qoyska – Ågrenska

Ma tahay waalid leh ilmo, dhalinyaro ama qof weyn oo ay ku adag tahay, tusaale ahaan, feejignaanta, digtoonaanta, salfudaydnimo, waxbarashada ama leh hab dhaqan qasbid?

Qaybta taageerada qoyska ee ay maamusho Ågrenska iyadoo wakiil ka ah magaalada Göteborg, waxaad ka heli kartaa la-talin iyo wicitaanno taageereed ama waxaad ka qaybgeli kartaa koorsooyinka iyo shirarka waalidnimada.

Talefoon: 0708-22 50 96 ama 0730-76 89 11

Iimayl:

familjestodsensheten@agrenska.se

Bogga internetka:

agrenska.se/familjestodsensheten/

Cinwaanka: Lillövägen 20, Lilla Amundön, Hovås

Hagid loogu talagalay carruurta iyo dadka waa wayn ee naafada ah

Da' walba

Bilaash!

Haddii aad qabto su'aalo ku saabsan taageerada ama xuquuqda ubadkaaga naafada ah, markaa hagahu wuxuu ku wargelin karaa oo kugu hagi karaa caawimada ay bulshadu u hayso carruurta iyo dadka waaweyn ee naafada ah.

Tusaale ahaan, waxay noqon kartaa wax ku saabsan waxqabadyada daryeelka caafimaadka, gargaarka, baahi waafajinta guriga, adeegyada safarka ama taageerada sida uu qabo xeerka LSS (Xeerka taageerada iyo adeegyada dadka naafada ah qaarkood) ama SoL (Sharciiga Adeegga Bulshada).

Talefoon: 031-367 98 08

Iimayl: lotsforbarnochvuxna@funktionsstod.goteborg.se

Bogga internetka:
goteborg.se/lotsforbarnochvuxna

Besöksadress: Slottskogsgatan 12, Göteborg

Cinwaanka: Box 4053, 422 05, Hisings Backa

Maxaaddada: Mariaplan ama Jaegerdorffsplatsen



Qaybta taageerada naafada ee Koonfurta-galbeed ee magaalada

Bilaash!

Adiga ku nool koonfurta-galbeed ee magaalada Göteborg lina naafo waxaad naga codsan kartaa talo-bixin, taageero iyo adeeg. Tani waxay sidoo kale khusaysaa adiga oo ah waalid ama qaraabo la ah qof u baahan taageero. Taageeradu waxay noqon kartaa, tusaale ahaan, taageerada hoyga, daryeelka guriga, guri leh adeeg gaar ah ama kaalmo shakhsiyeed.

*Xeerka taageerada iyo adeegyada dadka naafada ah qaarkood (LSS) iyo sharciga adeegga bulshada (SoL) ayaa xukuma nooca wax-ka-qabashada ee dadka naafada ahi ay xaq u leeyihiin.

Talefoon: 031-366 56 21

Iimayl: myndighet.sydvast@funktionsstod.goteborg.se

Cinwaanka: Järnbrotts prästväg 2, Västra Frölunda

Maxaaddada: Radiovägen



Taageerada carruurta iyo dhalinyarada

Xarunta qaabilaadda dhalinyarada ee galbeedka magaalada

13-24 jir

Bilaash!



Halkan waxaad kaga hadli kartaa wax kasta oo ku saabsan jacaylka, galmada iyo cudurada jinsiga ilaa dhacdooyinka adag iyo fikradaha nolosha la xariira. Waxa kale oo aad samayn kartaa baaritaanka uurka oo aad is baari kartaa. Anaga waxaad naga heli kartaa daaweyn iyo daawayn maskaxeed, taageero iyo macluumaad. Xarunta qaabilaadda waxaa ka shaqeeya umuliso, kalkaaliye caafimaad, lataliye, cilmi-nafsi yaqaan iyo khabiir dhakhtar oo guud. Sido kale waxaa magaalada Göteborg ka jira xarumo qaabilaadda dhalinyarada ah oo aad tagi karto.

Talefoon: 010-435 82 30

Bogga internetka:

vgregion.se/halsa-och-varld/ungdomsmottagning/

Cinwaanka: Kaverös Äng 5, Västra Frölunda

Maxaaddada: Musikvägen

Xarunta Mini-Maria

13-21 jir

Bilaash!

Xarunta Mini-Maria ee Göteborg waxay u adeegtaa dhalinyarada iyo da'yarta oo ay da'doodu tahay ilaa 21 jir ee qaba su'aalo ama walaacyo la xiriira khamriga ama daroogada, iyo sidoo kale waalidkood ama qaraabadooda.

Xarumahenna waxaad talo, taageero iyo daawayn ka heli kartaa.

Cilmiga-bulsho-yaqaanadeenna, kalkaalisoooyinkeenna, cilmi-nafsiyaqaanadeenna iyo dhakhaatiirteenna. Waxaan sidoo kale haynaa tababar waalid oo ku saabsan xashiishadda iyo aqoonta daroogada. Dhammaan booqashooyinka xarunta Mini-Maria waa lacag la'aan waxaana na saaran waajibbaad sir-xejinta ah.

Talefoon: 031-367 99 40

Bogga internetka: minimaria.se

Maxaaddada: Norra Hamngatan 8, Göteborg

Maxaaddada: Domkyrkan ama Stenpiren

Xarunta heeganka ee gabdhaha ee galbeedka magaalada

10-25 jir

Waxaad naga heli kartaa taageero qaab onlayn internetka ah markaad lasoo xariirta qaybta heeganka adoo isticmaalaya qoraal-sheekeysii, iimaylka iyo app-ka taleefoonka gacanta. Waxaan diiradda saaraynaa qof kasta oo isku arka gabdh iyo haweenka da'da yar oo inta badan da'doodu u dhaxayso 10 iyo 25 sano.

Bogga internetka: tjejjourenvast.se



Xarunta Solrosen

Tani waa waxqabad loogu talagalay carruurta iyo dhalinyarada halkaas oo waalidka, walaalka weyn ama xubin kale oo qoyska ka mid ah xiranyahay ama horay loo xiray. Xarunta Solrosen, waxaad ku cabbireysaa ereyo waxaad ka fikireyso ama aad dareemayso in xubin qoyska ka tirsan laga qaado xorriyadda. Marka qof qoyska ka mid ah la xiro, qoysku wuxuu geli karaa xaalad dhibaato ah, carruurta iyo dadka waaweynba waxay dareemi karaan sidii in gef galeen oo kale iyo ceeb labadaba.

Talefoon: 031-712 13 10

limayl:

solrosen@raddningsmissionen.se

Cinwaanka: Andra Långgatan 19,
Göteborg

Maxaaddada: Järntorget

Kooxda fagaaraha ee koonfurta-galbeed ee magaalada Göteborg

Kooxda Fagaaraha waxay ka shaqeysaa wacyigelinta iyo ka hortagga is-dhexgalka ku dhisan ee dhalinyarada dhexdooda ah. Waxay noqon kartaa wada hadal iyo taageero si loo abuuro jawi nabdoon, u gudbinta ururada ama helida nashaadyada xilliga firaqada ku haboon. Kooxda Fagaaraha waxay bannaanka joogaan maalmihi, fiidkii iyo maalmaha fasaxa ah ,sidaas darteed waxay la kulmi karaan dhalinyarada marka ay joogaan dugsiga iyo xilligooda firaqada labadaba.

Talefoon: 0736-24 83 91 ama
0727-21 48 47

Cinwaanka: Topasgatan 13 B,
Västra Frölunda

Waxqabadka dhexdhexaadinta

Bilaash!

Dhexdhexaadinta la xariirta dembigu waxay micaheedu tahay wadahadal ikhtiyaari ah oo dhexmara dembiilaha iyo dhibbanaha dembiga ka dib marka dhacdada loo sheegay booliiska, taas oo dembiilaha da'diisana tahay 12-21 sano sidoo kalena qirtay dembiga ama ka qaybgalka. Ujeedada dhexdhexaadintu waa in la yareeyo cawaaqib xumada ka dhalan karta dhacdada, sida xanaaq ama cabsi. Hab-raacu wuxuu ku bilaabmayaa in qof kasta oo dhalinyaro ah lagu martiqaado kulan xogeed shakhsi ah, ka dibna waxay go'aan ka gaari doonaan haddii ay rabaan inay heshiiyaan oo la dhexdhexaadiyo. Dhexdhexaadiyuhu waxa kale oo uu sameeyaa qiimayn ku saabsan in dhexdhexaadintu habboon tahay iyo in kale. Dhexdhexaadintu waxay ku dhici kartaa qaab warqad ah, salaan ama kulan lala yeesho dhexdhexaadiyaha.

Talefoon: 031-367 93 43

Iimayl: medling@socialcentrum.goteborg.se

Bogga internetka: goteborg.se/medling

Cinwaanka: Norra hamngatan 8, Göteborg

Maxaaddada: Brunnsparcken

Hanjabaadda iyo gacan ka hadalka ka dhex dhaca xiriirada dhow

Ma kula nooshahay hanjabaad iyo rabshad qoyskaaga, qaraabadaada ama xiriir kale oo dhow? Miyaad la kulantay rabshad maskaxeed, maaliyadeed, galmo ama jireed sida riixid, laad iyo feer? Miyuu qof kugu qasbayaa inaad sameyso waxyaabo aadan rabin inaad sameyso ama kaa mamnuuca inaad sameyso waxyaabaha aad rabto inaad sameyso? Mise qof kale baad u geysataa rabshad? Halkan waxaad ka heli kartaa caawimo iyo taageero.

Xarunta qaabilaadda ee Nadja

Bilaash!

Xarunta qaabilaadda ee Nadja waa khad caawineed iyo qaabilaad ku dhisan wadahadal oo loogu talagalay adiga la kulmo rabshado xiriirada dhow ama kuwa qaraabada ah oo u baahan taageero. Waxa aanu joognaa badhtamaha Göteborg waxana aanu u diirraddeenna saarantahay dadka ku nool gobolka Göteborg oo ay ku jiraan degmooyinka ku xeeran.

Talefoon: 020-81 00 00

Bogga internetka: stadsmissionen.org/detta-gor-vi/nadja-mottagningen/



Xarunta BOJEN

Waa waxqabad loogu talagalay carruurta, dhalinyarada iyo waalidiinta la kulmay rabshado qoyseed. Waxaa jira taageero qaab koox ahaan iyo qaab shaqsi ahaanba

Talefoon: 031-15 01 30

Iimayl: bojen@bojengoteborg.se

Khadka nabadda ee haweenka

Khadka nabadda ee haweenku waa taleefoon taageero qarameed ah oo lagugu talagalay adiga la kulmay hanjabaad iyo rabshad. Sidoo kale adiga la ah qaraabo iyo saaxiibba waad soo wici kartaa. Khadka nabada ee haweenka wuxuu furan yahay 24 saac maalintii, waxaadna wici kartaa lacag la'aan. Wicitaanku kama muuqanayo biilka taleefanka.

Talefoon: 020-50 50 50

Bogga internetka: kvinnofridslinjen.se

Xarunta qaabilaadda ee Mika

Adiga ku hela galmada lacag ama isku waxyeelaynaaya galmada waxa aad raadsan kartaa Xarunta qaabilaadda ee Mika. Waxaad noola iman kartaa fikradaada oo aad ka doodi kartaa xaaladaada.

Talefoon: 020-32 73 28

Bogga internetka:
goteborg.se/mikamottagningen

Xarunta xaaladaha adag ee haweenka

Adiga ah qof dumar ah lana kulmaaya ama la kulmay hanjabaad iyo gacan ka hadal oo ka timaada lammaane, lammaane hore ama qof kale oo kuu dhow, waad nala soo xidhiidhi kartaa. Waad nasoo wici kartaa annaga saacad walba, sanadka oo dhan. Waxaan ku siin karnaa hoy aamin ah iyo wadahal taageereed. Haddii aad carruur leedahay, sidoo kale waan caawin karnaa ayagaba. Adiga u gaysanaaya ama u gaystay lamaanahaaga, lamaanahaagi hore ama qof kasta oo kale oo kuu dhow hanjabaad ama rabshad ayaa sidoo kale nala soo xidhiidhi kara.

Noo imaatankeenna wax kharash ah malaha, hoyga ayaa kaalma laga helo Xafiiska Adeegga bulshada loo baahan yahay.

Talefoon: 031-367 93 80

Iimayl: kriscentrum.for.kvinnor@socialcentrum.goteborg.se

Bogga internetka:
goteborg.se/kriscentrumforkvinnor

Cinwaanka: Carl Grimbergsgatan 7, Göteborg

Maxaaddada: Brunngatan

Khadka taleefanka ee “Dooro in joojisid”

Dooro in joojisid waa khadka talefoonka qarameed ee loogu talagalay adiga doonaya in heshid caawinaad ah in bedeshid hab-dhaqanka xakamaynta ama rabshadaha ku dhisan.

Talefoon: 020-55 56 66

Webbplats: valjattsluta.se

Xarunta xaaladaha adag ee ragga

Xarunta waxaa loogu talagalay adiga leh dhibaatooyin ay sababeen dadka xiriirkaga ee dhaw. Waxay noqon kartaa dhibaatooyinka xiriirka, xaaladaha adag ee la xiriira kala tagga, dhibaatooyinka waalidnimada ama in aad qof dhibaateysay ama naftaada la dhibaateyay rabshado ay sababeen xiriirada dhaw.

Talefoon: 031-367 93 90

Bogga internetka:

goteborg.se/kriscentrumforman

Cinwaanka: Kronhusgatan 2 F,
Göteborg

Waalid – ungarelationer.se

Taageero ku socota adiga waalid ahaan haddii ilmahaagu la kulmo rabshado la xariira xiriirkooda. Bogga internetka waxa uu ku siinayaa adiga ah qof qayn taageero iyo macluumaad. Halkani waa meesha aad raadsan karto haddii ubadkaaga ama kuraygaaga ee kaa ag dhaw ay la kulmaan rabshado ama u geysanaaya rabshad lammaanahooda.

Talefoon: 08-754 52 00

Bogga internetka:

ungarelationer.se/förälder

Booliska

Si aad u qaylo dhaamiso wac 112. Wixii arrimo kale ah iyo talooyin wac 114 14.



Marka rabshadaysan yihiin ama dhibaataysan yihiin carruurta iyo dhalinyarada

Adiga ah caruur ama dhalinyaro, mararka qaarkood waxaa dhici kara waxyaabo adag oo keenaya in aad dareentid caafimaad xumo ama cabsi. Waxaa laga yaabaa inaad guriga dhibaato kala kulantid dadka waaweyn ee is dagaalaya, cabbaya khamri badan ama qaadanaaya daroogada.

Mar walba waxaad wici kartaa xafiiska adeegga bulshada ee xaafaddaada, kaasoo furan maalintii. Xafiiska Adeegga degdegga ee bulshadu waxa uu ku siinayaa gargaar degdeg ah fiiidadii, habeenkii iyo maalmaha fasaxa ah marka ay xidhan yihiin xafiisyada adeega bulshada ee degmada. Waxaad sidoo kale raadsan kartaa Barnahus ama Maskrosbarn.

Talefoon: 031-365 00 00

limayl: socialsydvast@socialsydvast.goteborg.se

Talefoon Socialjouren:
031-365 87 00

Xarunta Barnahus

Guriga carruurta ee Barnahus waxa uu wax ka qabtaa carruurta iyo dhallinyarada la kulma gacan-ka-hadalka iyo xadgudubyada ama arkay gacan-ka-hadal dhexmaray dadka xidhiidhka dhow ka dhexeeyo. Guriga carruurta ee Barnahus waxaa wada shaqeeya xoghayaha xafiiska arrimaha bulshada, booliiska, xeer-ilaalinta, dhakhtarka carruurta iyo cilmi-nafsi-yaqaanada ee carruurta iyo dhallinyarada.

Talefoon: 031-367 93 95

Iimayl: barnahus@socialcentrum.goteborg.se

Bogga internetka: goteborg.se/barnahus

Marka ay dhacdo gacan-ka-hadal iyo cadaadis la xariirta sharaf

Mala nooshahay adiga ama qof kuu dhow gacan-ka-hadal sharaf, cadaadis mana u baahan tahay taageero iyo caawin?

- » Reerkaaga iyo/ama qaraabadaada maku koontaroolaan?
- » Ma lagaa filayaa inaad qof qoyskaaga kamid ah ilaalisid?
- » Miyaad ka welwelaysaa mustaqbalkaaga oo lagaa ilaaliyaa inaad doorato jidkaaga?
- » Ma inaad qarisaa qofka aad jeceshahay ama la joogtid?
- » Ma u tahay dhibane rabshado ama ceebeyn?

Waxaa kale oo aad la xariiri kartaa waxqabadyada aad heli kartid cinwaanka **”Hanjabaadda iyo gacan ka hadalka ka dhex dhaca xiriirada dhow”**.

Xarunta Maskrosbarn

Waxaa loogu talagalay adiga leh waalid leh balwad, caafimaad xumi dareemaya ama kugala kacaaya rabshad.

Talefoon: 076-721 02 56

Cinwaanka: Sten Sturegatan 36, Göteborg

Kooxda caawinta ee sharaf Koonfurta Galbeed ee magaalada

Waxaad la xidhiidhi kartaa kooxda caawinta sharaf wixii talo iyo taageero ah. Ma aha inaad sheegto qofka aad tahay. Waxaan nahay kuwoo sosocdo, waxaana kugula kulmi karnaa meel kuu habboon.

Talefoon: 070-417 95 46

Iimayl: resursteam@socialsydvast.goteborg.se

Bogga internetka: goteborg.se/wps/portal/start/social--och-familjefragor/missbruk-vald-och-brott

Xarun goboleedka taageerada ee Sharaf

Talefoon: 020-34 03 03

Iimayl: stodcentrumheder@socialcentrum.goteborg.se

In badan oo kale oo aad u aadi kartid taageero

BRIS – Xuquuqda carruurta ee bulshada dhexdeeda

Bogogga internetka waxa kale oo suurtoagal ah in lala sheekaysto la-taliyaal ama la xidhiidho dadka kale oo ku jira xaalad la mid ah.

Talefoon ay wici karaan waalidiinta iyo dadka waa wayn: 0771-50 50 50

Talefoonka carruurta iyo dhalinyarada: 116 111

Bogga internetka: bris.se

Hay'adda badbaadinta carruurta ee Rädga Barnen

Talefoonka welwelka la xariira xag-jireynta

Talefoon: 020-10 02 00

Taagero qaab sheeko-qoraaleed ah

Loogu talagalay adiga ku hoos nool gacan-ka-hadal sharaf iyo cadaadis

Chatt: raddabarnen.se/
rad-och-kunskap/karleken-ar-fri/

Iimayl: stodchatt@rb.se

Laanqayrta Cas - Taageerada dadka dib u noqonaya

Ma qabtaa su'aalo ku saabsan dib u noqoshada ama habka magangalyo doonka? Markaa waxaad noo soo diri kartaa iimayl maalin kasta ama waad na soo wici kartaa maalmaha Arbacada saacadaha 9-12.

Talefoon: 020-41 50 00

Iimayl: returnsupport@redcross.se

Bogga internetka: rodakorset.se/fa-hjalp/asylfragor/stod-till-atervandande/

Ururka Stadsmission Göteborg

Qof kasta oo ku nool Göteborg waa inuu helaa fursad wadajirimo, wehel iyo horumar shaqsiyeed, iyadoon loo eegayn duruufaha dhaqaale ama bulsho. Waxaan kuu haynaa goobo kulan oo loogu talagalay dhalinyarada iyo dadka waaweyn labadaba. Waxaan bixinnaa tiro noocyo kala duwan oo taageero ah oo loogu talagalay kuwa u baahan wadajirimo, wax yar oo cunto ah ama koob qaxwo oo kulul. Gal bogga internetka si aad u hesho macluumaad cusub oo ku saabsan wakhtiyada uu furanyahay iyo kooxaha.

Talefoon: 031-755 36 00

Bogga internetka:
stadsmissionen.org/fa-stod/

Ururka Hawlgalka Samatabixinta ee Rädgningsmissionen – Carruurta iyo qoyska

Waxaan ka shaqeyneynaa inaan abuurno goobo kulanno iyo xiriiro halkaas oo arrimaha carruurta iyo xuquuqda carruurta diiradda lagu saarayo. Waxaan sidoo kale leenahay goobo kulan oo loogu talagalay soo galootiga cusub halkaas oo luqadda, xiriirka iyo hal-abuurka ay yihiin diiradda waxa la saarayo.

Talefoon: 031-712 12 00

Bogga internetka:
raddningsmissionen.se

Ururka gabbaad siinta Göteborg ee Skyddsvärnet

Ujeedada Ururka Gabbaad siinta waa in laga hortago takoorka bulshada iyo in xaalad wanaagsan loo abuuro dadka qaba dhibaatooyinka nafsaniiga ah iyo noocyada kala duwan ee dibad-ka-joogga bulshada. Halkan waxa ay ku leeyihiin waxaa kamid ah hoy gabbaad ah, rugta cilmi-nafsiga iyo xarunta dhalinyarada.

Talefoon: 031-60 07 80

Bogga internetka: skyddsvarnet.org

Kaniisadda Swiidhan

Göteborg waxaa ku yaal dhowr kaniisadood oo ay ku jiraan Askim iyo Högsbo. Bogga internetka waxaad ka heli kartaa kaniisadda kuugu dhow iyo macluumaad ku saabsan hawlaha kale.

Bogga internetka:
svenskakyrkan.se/kontakt

La talinta qoyska ee Kaniisadda Swiidhan

La-talinta qoyska iyo daaweynta lammaanaha ee kaniisadda Iswiidhan waxaa loogu talagalay lammaanaha iyo qoysaska la kulmo dhibaatooyinka xiriirka ee noocyada kala duwan ah. Halkaan ayaa imaan kartaan halkan haddii, tusaale ahaan, aad rabto inaad awood u yeelatid inaad si fiican u wada xidhiidhaan, yaraysaan khilaafkiinna ama aad heshaan hagitaan kale oo ku saabsan xidhiidhka.

Talefoon: 031-15 53 50

Cinwaanka: Lilla Stampgatan 1 B,
Göteborg

Bogga internetka: [svenskakyrkan.se/
familjeradgivningingen/goteborg](http://svenskakyrkan.se/familjeradgivningingen/goteborg)



Daryeelka caafimaadka

Halkaan waxaad ka heleysaa macluumaadka xiriirka ee daryeelka caafimaadka ee Koonfurta-galbeed ee magaalada Göteborg. Waxaad la xidhiidhaysaa rugta caafimaadka haddii adiga ama ilmahaagu u baahan tihiin daryeel caafimaad. Dhammaan xarumaha daryeelka waxay kaloo leeyihiin xarunta daryeelka carruurta (BVC). Halkan waxaa lagu qaabilaa carruurta min dhalashada ilaa da'da dugsiga. Xarunta BVC waxay kaa taageeraysaa waalid ahaan wax kasta oo waalidnimadu ku jirtot, waxayna kaa caawinaysaa sidii ilmahaagu u heli lahaa horumar wanaagsan xagga caafimaadka iyo amaan-qabidda.

Waxa kale oo jira saddex xarumoo oo rug umuliso ah (BMM) kuwaas oo bixiya: daryeelka muddada uurka iyo ka dib, taageerada waalidnimada, la-talinta ka-hortagga uur-qaadida iyo tijaabo qaadista unugyada xubinta dhalmada ee dumarka.

**Marka
xaaladaha
degdega ah
wac 112**



Xarumaha caafimaadka iyo xarumaha daryeelka carruurta (BVC)

Rugaha umulisooyinka Askim, Frölunda Torg, Trädet/Frölunda

Talefoon

Askim: 031-346 08 80

Frölunda Torg: 031-346 08 60

Trädet/Frölunda: 031-346 08 90

Cinwaanka

Askim: Datavägen 1, Askim

Frölunda Torg: Näverlursgatan 36,
Västra Frölunda

Trädet/Frölunda: Pianogatan 86,
Västra Frölunda

Xarunta caafimaadka ee Capio Hovås, Askim

Talefoon

Xarunta caafimaadka: 031-352 30 30

BVC: 031-352 30 42, 51, 57

Cinwaanka: Hedtångsvägen 8, Hovås

Dhakhtar qoyska ee Hovås Askim iyo BVC

Talefoon

Xarunta caafimaadka: 031-727 90 00

BVC: 031-727 90 06

Cinwaanka: Askims torg 5, Askim

Dhakhaatiirta Högsbo

Talefoon: 031-58 68 00

Cinwaanka: Högsbogatan 40,
414 80, Göteborg

Xarunta daryeelka Johannes ee Tynnered

Talefoon: 031-89 29 30

Cinwaanka: Trollbärsvägen 16 A,
Västra Frölunda

Xarunta caafimaadka ee Närhälsan Högsbo

Talefoon: 031-747 80 00

Cinwaanka

Xarunta caafimaadka: Markmyntsgatan
14 A, Göteborg

BVC: Markmyntsgatan 14 C, Göteborg

Xarunta caafimaadka ee Närhälsan Opaltorget

Talefoon

Xarunta caafimaadka: 031-346 08 00

BVC iyo Xarunta qoyska:
031-747 83 90, 91, 92

Cinwaanka

Xarunta caafimaadka: Zirkongatan 5,
Västra Frölunda

BVC iyo Xarunta qoyska: Zirkongatan 7,
Västra Frölunda

Xarunta caafimaadka ee Nārhälsan Sisjön

Talefoon

Xarunta caafimaadka: 031-747 93 00

BVC: 031-747 93 45, 46

Cinwaanka: Datavägen 1, Askim

Xarunta caafimaadka ee Nārhälsan Frölunda

Talefoon

Xarunta caafimaadka: 031-346 07 00

BVC: 031-346 08 91, 92, 93, 94.

Cinwaanka

Xarunta caafimaadka: Frölunda Torg 11, Västra Frölunda

BVC: Pianogatan 86, Västra Frölunda

Xarunta caafimaadka ee Nārhälsan Styrso

Talefoon

Xarunta caafimaadka: 031-747 80 50

BVC: 031-747 80 76

Cinwaanka: Brattenvägen 13, Styrso

Xarunta Qaddarinta ee Omtanken Grimmered

Tealefoon

Xarunta caafimaadka: 031-352 06 10

BVC: 031-352 06 13

Cinwaanka

Xarunta caafimaadka: Lergöksgatan 2 B

BVC: Lergöksgatan 2 B



Xarunta Qaddarinta ee Omtanken Frölunda Torg

Talefoon

Xarunta caafimaadka: 031-380 48 40

BVC: 031-352 06 13

Cinwaanka

Xarunta caafimaadka: Lilla Marconigatan 31

BVC: Lergökgatan 2B

Dhakhaatiirka Wäster ee xaafadda Hängpilsgatan

Talefoon: 031-29 90 70

Cinwaanka: Hängpilsgatan 3, Västra Frölunda

Dhakhaatiirta Wäster ee xaafadda Redegatan

Talefoon: 031-29 90 95

Cinwaanka: Redegatan 1 B, Västra Frölunda

Dhakhaatiirka Wäster ee soo kabashada

Baaritaanka iyo daawaynta da' walba, khibradda takhasus u leh carruurta ayaa jirta.

Cinwaanka: Redegatan 1 B, Västra Frölunda

Talefoon: 031-29 90 96

Rugta daaweynta carruurta iyo dhalinyarada

Waxaan nahay rug caafimaad oo furan oona bixisa daryeel khibdradeysan oo gaar ou ah carruurta iyo dhalinyarada da'doodu u dhaxayso 0 iyo 18 jir.

Waxaan sameynaa baaritaanno caafimaad iyo daawaynta cudurrada daba-dheeraada ee aan u baahnayn in ilmahaaga la seexiyo. Caadi ahaan waxaad noo imaaneysaan markii xarunta caafimaadka ama isbitaalka idin soo gudbiyaan.

Talefoon: 031-747 93 60

Bogga internetka: vgregion.se/regionhalsan/bum

Cinwaanka: Topasgatan 59, Västra Frölunda

Hagaha daryeelka

Waa meesha lagu aruuriyo macluumaadka iyo adeegyada caafimaadka iyo daryeelka ee Swiidhan oo dhan. Halkaan waxaad ka heli kartaa talo ku saabsan daryeelka waxaana lagugu hagaajin karaa xarunta daryeelka ee saxda ah. Wac 1177 si aad u hesho talada daryeelka caafimaadka. Waxay furantahay afar labaatanka saac.

Bogga internetka: 1177.se

Rugaha caafimaadka ee carruurta qaba xanuunka dhimirka

Haddii aad leedahay ilmo qaba cudurka dhimirka, waxaad la xiriiri kartaa xarumaha daryeelka Johannes iyo Omtanken. Waxay qaabilaan carruurta iyo dhalinyarada da'doodu u dhaxayso 6 iyo 17 (sanadka ay buuxinayaan 18 sano). Waalidiinta sidoo kale waa lagu soo dhaweynayaa inay nala soo xiriiraan. Daryeel-doonku uma baahna in lagu qoro xarumaha daryeelka, gargaarkuna waa lacag la'aan. Waxaanu samaynaa qiimayno waxaanu bixinnaa waxqabadyo daaweyn ah oo gaaban oo loogu talagalay xanuunka dhimirka ee ku meel gaadhka ah, shakhsi ahaan, koox ahaan iyo iyadoo lasoo maraaya intarneedka. Ma qabanno soo gudbinnada isbitaalada kale, waxaad si toos ah nooga soo raadsanaysaa daryeel.

Waxaad caawimo naga heli kartaa:

- » haddii aad u baahan tahay in lagaa caawiyo la tacaalida cabsida, welwelka iyo walbahaarka.
- » haddii ay dhibaato kaa haysato hurdada ama kadeed.
- » haddii aad murugeysantahay ama aad niyad-jabsan tahay.
- » haddii ay dhibaato kaa haysato
- » dareen la'aan iyo xanaaq.
- » haddii adiga waalid ahaan aad u baahan tahay in lagaa caawiyo waalidnimadaada.

Haddii ilmahaagu ka muuqato inuu u baahan yahay qiimayn takhasus leh, baaritaan ama daaweyn, waxaad la xiriiri kartaa xarunta cilmi-nafsiga carruurta iyo dhalinyarada, BUP.

Warqadda u gubbinta BUP waxaad ka heli kartaa adeega caafimaadka ee dugsigu, BVC, xarunta daawaynta carruurta, rugta dhalinyarada ama xarunta daryeelka. Waxaad sidoo kale wici kartaa BUP wixii talo iyo la tashi ah.

Xarunta daryeelka Johannes

Talefoon: 031-89 29 30,
073-501 28 35

Cinwaanka: Trollbärsvägen 16,
Västra Frölunda

Xarunta caafimaadka ee Omtanken

Talefoon: 031-380 48 44

Cinwaanka: Lilla Marconigatan 31,
Frölunda Torg

Rugta cilmi-nafsiga ee carruurta iyo dhalinyarada BUP - Frölunda

Talefoon: 031-342 02 01

Cinwaanka: Frölunda Torg,
Västra Frölunda

Rugta daryeelka ilkaha ee dadweynaha

Annaga, waxay naga helayaan carruurta iyo dadka waaweynba caawimaad la xariirta wax kasta oo ku saabsan talo bixinta arrimaha ilkaha iyo baaritaannada joogtada ah iyo daaweynta adag. Waxa kale oo aanu wada shaqayn dhaw la leenahay asaxaabtayada ka shaqeeya Rugaha daryeelka ilkaha ee dadweynaha ee takhasuska leh.

Rugta daryeelka ilkaha ee dadweynaha ee Xarunta dhaqanka Frölunda

Talefoon: 010-441 96 10

Cinwaanka: Valthornsgatan 13, Västra Frölunda

Maxaaddada: Frölunda Torg

Iimayl:

ftv.frolunda.goteborg@vgregion.se

Bogga internetka:

folkvandarden.vgregion.se

Rugta daryeelka ilkaha ee dadweynaha Topas

Cinwaanka: Topasgatan 59, Västra Frölunda

Talefoon: 010-441 83 70

Rugta daryeelka ilkaha ee dadweynaha Styrso

Cinwaanka: Brattenvägen 13, Styrso

Talefoon: 010-441 88 30

Rugta daryeelka ilkaha ee dadweynaha Askim

Cinwaanka: Askims torg 5, Askim

Talefoon: 010-441 98 80

Rugaha caafimaadka ilkaha oo badan waxaad ka heli kartaa degmooyinka koonfurta-galbeed ee magaalada **bogga internetka:** folkvandarden.vgregion.se



Waa salaamantahay waalid!

Hagaha waalidka ee koonfurta galbeed ee Göteborg waxaa sidoo kale lagusoo degsan karaa Af swiidhish iyo afaf kale iyadoo la booqanaya bogga internetka ee **goteborg.se/foraldrastod** -> Hagaha waalidka oo la daabacan karo

Waxaa jira meelo badan oo Göteborg kamid ah oo aad kula kulmi karto waalidiin kale iyo caruur, aadna ka heli karto dhiirigelin ama aad ka heli karto talooyin ku saabsan arrimaha muhiimka kuu ah.

Si sax ugu hel wixii u baahantahay bogga internetka ee **goteborg.se/foraldrastod**

Wax maad tabaysaa ama ma qabtaa fikrado ku saabsan buug-yaraha? Fadlan la xidhiidh: **foraldraguide@socialsydvest.goteborg.se**

Hawlaha hadda socda iyo munaasabadaha ka jira magaalada oo dhan, ka eeg kaalender-ka magaalada Göteborg **kalendarium.goteborg.se**